

# DOORKA URURRADA DIINTA EE SIYAASADDA SOOMAALIYA

## DHAQDHAQAAQYADA MUHIIMKA AH IYO FURSADAHA KA-QEYBGALKA

Stig Jarle Hansen, Mahad Waasuge,
Cabdimaalik Abdullahi, iyo Cabdullaahi Aadan

Rift Valley Institute
MAKING LOCAL KNOWLEDGE WORK

Somali Public Agenda

# DOORKA URURRADA DIINTA EE SIYAASADDA SOOMAALIYA

## DHAQDHAQAAQYADA MUHIIMKA AH IYO FURSADAHA KA-QEYBGALKA

**Stig Jarle Hansen, Mahad Waasuge, Cabdimaalik Abdullahi, iyo Cabdullaahi Aadan**

Rift Valley Institute
MAKING LOCAL KNOWLEDGE WORK

Somali Public Agenda

**Mahadnaq/Xuquuq:**

Warbixintan waxaa qoray Stig Jarle Hansen, Mahad Waasuge, Cabdimaalik Cabdullaahi, iyo Cabdullaahi Aadan. Cilmibaaristan waxaa la sameeyay iyadoo lala kaashanayo Somali Public Agenda. Ken Barlow ayaa sidoo kale tifaftiray warbixinta. Waxaan sidoo kale u mahadcelineynaa Partha Moman, Dr Cabdiraxmaan Cabdullaahi iyo Dr Christopher Anzalone faallooyinka qiimaha leh oo ay ka bixiyeen warbixinta.

**Machadka Rift Valley** wuxuu ka shaqeeyaa Bariga iyo Bartamaha Afrika si uu usoo saaro aqoon maxalli ah oo xoojisa horumarka bulshada, siyaasadda iyo dhaqaalaha.

**Somali Public Agenda (SPA)** waa hay'ad aan macaash-doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho.

# WAXA KU JIRA

**Nuxurka Warbixinta** 8

**1. Hordhac** 10
Habka loo sameeyay cilmibaarista 11

**2. Islaamka iyo Soomaaliya: Dhaqanka iyo caqiidooyinka fikradeed** 13
Shaafici iyo Suufiyada 13
Kuwii danbe: Salafiyiintii iyo Ikhwaaninimada 15

**3. Urrurada iyo shakhsiyaadka ugu muhiimsan** 17
***Al-Islaax*** (Ikhwaan) 17
***Dam Jadiid*** (Ikhwaan) 20
***Aala Sheekh*** (Ikhwaan) 22
***Al-Ictisaam*** (Salafi) 22
***Majmaca Culimada*** 23
***Ahlu Sunna Wal Jamaaca*** (Sufi) 24

**4. Is-dhexgalka qabiilka, diinta iyo macaash-doonka** 27

**5. Doorka kooxaha diimeed ee dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed** 30
Jabhado hubeysan 31
Ururrada diinta ee u halgamaya isbeddelka nidaam 31
Xisbiyada siyaasadeed ee urur diimeedyada 32
Saameynta shaqsiga/ama shabakadaha isku xiran 33
Saameynta lagu sameeyo adeeg bixinta 33
Saamayn siyaasadeed oo dadban 34
Dhaqdhaqyada urur diimeedyada iyo siyaasadda Soomaaliya ee maanta 34

**6. Gunaanad iyo talooyin tixgelin mudan** 36
Talooyin tixgelin mudan 36

**Tixraac** 38

# NUXURKA WARBIXINTA

- Ururrada diinta – iyo hogaamiyayaasha xiriirka la leh – waxay muddo dheer saameyn weyn ku lahaayeen muuqaalka siyaasadda Soomaaliya. Kooxahani waa kuwo firfircoon, isbedbedelkana la qabsi og mararka qaarkoodna iskasoo horjeeda oo inta badan u shaqeeya sidii shabakad dabacsan islamarkaana aan lahayn qaab isku xernaan urureed ee cad.

- Tan iyo burburkii qarankii Soomaaliya sanadkii 1991-kii, ururrada diinta waxay muujiyeen awood iyo adkeysi xooggan marka la barbar dhigo jilayaasha kale ee isbedbeddelka badan. Sidaas darteed, waxay muujiyeen in ay yihiin meesha keliya ee leh xasillooni ee Soomaaliya.

- Inkastoo mararka qaarkood ay taageereen ururro kale ee siyaasadeed, ficillada ururrada diineed guud ahaan waxaa dhiirigeliya mabda', kamana dhashaan dano dhaqaale. Iyadoo ay taasi jirto, ayaa inta badan si kale waxaa u fahmay saamileyda dibadda. Tan waxa qeyb ahaan loo tiirin karaa in loo arko dhaqdhaqaaqa diineed mid rabshado leh, aragtidaas oo xoogeysatay waagii uu Mareykanku hoggaaminayay dagaalka ka dhanka ah argagixisada.

- Waxa kale oo jirta arrin ay inta badan reer galbeedku aaminsan yihiin oo ah in Soomaalidu diinta ka dhigato mid ay dano gaar ah ku gaaraan. Taasoo ay weheliso shaki ballaaran oo laga qabo is-dhexgalka diinta iyo siyaasadda, oo ay kala sooceen reer Galbeedka, mararka qaarkoodna u horseedaya in ay qaataan siyaasado khaldan.

- Gudaha Soomaaliya, doorka ururrada diinta ee siyaasadda waa mid la taaban karo. Dhinac marka laga eego, kooxa diineedku waxay si firfircoon uga qeyb qaataan dagaallada hubeysan ama waxay raadiyaan inay awood ku yeeshaan, ama ay saameyn ku yeeshaan dowladda. Dhinaca kale waxa jirta saameyn ballaaran ee bulshada ah oo ay adeegsadaan hoggaamiyeyaasha kooxaha diinta, kuwaasoo, inkastoo aanay si cad u ahayn siyaasad, laga yaabo in ay yeelan karaan saameyn siyaasadeed.

- Hoggaamiyeyasha diinta iyo ururradu waxa ay sidoo kale saameyn ku yeeshaan siyaasadda iyagoo bixinaya adeegyada dhinacyada horumarinta iyo bini'aadamnimada – iyagoo laf-dhabar u ah bixinta adeegyada muhiimka ah oo ay ahayd in ay bixiso dowladda. Ururrada diinta ayaa sidoo kale inta badan saameyn togan ku yeeshay siyaasadda aan xasilooneyn ee Soomaaliya, iyagoo taageera xooggan iyo dadaal ku bixiyey shirarka nabadda iyo dadaallada dib-u-heshiisiinta maxalliga ah.

- Tiro ururo Ikhwaan iyo suufi ah ayaa maanta ka dhex muuqda Soomaaliya. Waxaa kamid ah al-Islax (Ikhwaan), Dam Jadiid (Ikhwaan), Aala Sheekh (Ikhwaan), al-Ictisaam (Salafi), Majmaca Culimada iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca (Suufi). Ururradani waxay ka dhex jiraan xaalad ay daacadnimada iyo aqoonsigu isku milan yihiin, gaar ahaan dhinaca xiriirka ka dhexeeya qabiilka iyo ganacsiga. Isdhexgalka diinta iyo qabiilku waa mid is bedbedesha, oo leh dhaqdhaqaaqyo diimeed, inkastoo marka la eego caqabadaha ay wajahayaan, ay guulo waaweyn ka gaareen inay ka gudbaan qabiilka marka la barbar dhigo dhaqdhaqaaqyada kale ee bulshada ee Soomaaliya.

- Ganacsiga marka la eego, diinta waxay u leedahay qiimo wax-ku-ool ah, iyadoo abuuraysa kalsoonida macaamiisha iyadoo loo marayo muujinta sawir lagu kalsoonaan karo oo u oggolaaneysa ganacsatada inay galaan shabakadaha diinta. Arrin kale oo muhiim ah ayaa ah xeer-ka, oo ah nidaamka sharci ee soo jireen ah ee aad uga shaqeeya dhulka miyiga ah ee Soomaaliya, kaasoo ka duwan, ilaa xadna, caqabad ku ah shareecada.

- Marka la eego waayo-aragnimada ballaaran ee ay u leeyihiin nabadeynta, hoggaamiyayaasha diinta waxay u badan tahay inay u noqdaan saaxiibbo la isku halleyn karo qof kasta oo doonaya inuu arrimahan qeyb ka noqdo. Waxaa intaa dheer, ururrada diinta ayaa la filayaa in ay kaalin mug leh ka qaataan hannaanka dimuqraadiyeynta Soomaaliya ee curdanka ah iyo qaabeynta dejinta siyaasadda dalka sanadaha soo socda.

- Inkastoo ay jirto xiisadda la aaminsan yahay ee u dhexeysa qaar kamid ah ururrada diinta ee aan hubeysneyn iyo ku dhaqanka dimuqraadiyadda, sida sinnaanta jinsiga, qaar badan ayaa muujiyay in aanay is diiddaneyn diinta iyo dimoqraadiyadda.

- Si looga faa'ideysto doorka muhiimka ah ee ururrada diintu ay ku leeyihiin siyaasadda iyo dowladnimada Soomaaliya, dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada waa in ay sii wadaan wadashaqeynta dhow ee ay la leeyihiin kooxahan. Sidoo kale, bulshada rayidka ah ee Soomaaliya waa in ay soo dhaweeyaan ururrada diinta kana dhigaan xubno muhiim ah ee bulshada rayidka.

- Waxaa loo baahan yahay in lasii baaro doorka wanaagsan ee ay ururrada diintu ka ciyaari karaan Soomaaliya. Dowladaha caalamka waa inay ka fogaadaan halbeegga khaldan iyo sheekooyinka laga abuuray barnaamijka La-dagaalanka Argagaxisada, taa beddelkeedana ay garwaaqsadaan doorka wax-ku-oolka ah ee ay kooxahan ku leeyihiin, kuna sii yeelan doonaan, siyaasadda Soomaaliya.

# 1. HORDHAC

Tan iyo burburkii xukunkii Siyaad Barre sanadkii 1991, culumaa'udiinka iyo ururrada waxay saameyn weyn ku yeesheen siyaasadda Soomaaliya, mararka qaarna waxay qaateen doorkii hay'adaha waaweyn ee bini'aadamnimada.[1] Lagasoo bilaabo 2009 ilaa 2012, hoggaamiye diimeed – Shariif Sheekh Axmed – ayaa ahaa Madaxweyne.

Isbeddelladan mar walba si fiican looma fahmin, afar sababood oo waaweyn dartood. Marka koowaad, waxa loogu yeero La-dagaalanka Argagaxisada ayaa saameeyay sida dhaq-dhaqaaqyada diimeed loo qaabeeyey. Inkastoo ay jiraan kala duwanaansho aad u weyn oo xagga abaabulka iyo afkaarta ururrada Islaamiga ah, halista al-Qaacida awgeed, inta badan, ururradan waxaa si khaldan ugu arkay dadka ajaanibta ah inay yihiin kuwo rabshad leh, taasoo xagal daacisay xiriir in lala sameeyo.[2] Dhab ahaan, masraxa diinta ee Soomaalidu waa mid dhinacyo badan leh, oo ay ku jiraan ururro aan wax badan wadaagin al-Qaacida ama garabkeeda Soomaaliya ee al-Shabaab.

Midda labaad, daraasaadaha laga sameeyay siyaasadda Soomaaliya ayaa inta badan xoogga saaray kooxaha faa'iido doonka iyo dagaal oogayaasha, iyadoo Soomaalida loo arkay in ay diinta u adeegsadaan inta badan dariiq ay ku gaaraan dano gaar ah.[3] Habka noocaan oo kale ah ayaa indhaha ka daboolanaya xasiloonida ka dhex jirta ururo diimeedyo badan oo Soomaaliyeed marka loo eego xisbiyada siyaasadeed ee dalka ka jira iyo kooxaha hubeysan. Waxaa intaa dheer, aragtida ku dhisan in diinta loo isticmaalo dariiqo dano lagu gaaro ayaa ku guul daraystay in la tixgeliyo xaqiiqda ah in, xitaa haddii shakhsi ama koox ay dhiirigeliso faa'iido in ay helaan, waxaa laga yaabaa in lagu qasbo inay raacaan xeerar bulsho oo gaar ah si ay ugu muuqdaan kuwo aan diinta khilaafin.[4]

Aragtida ku dhisan in diinta loo isticmaalo dariiqo dano lagu gaaro waxay sidoo kale dayaceysaa daraaseynta shabakadaha diinta ee ka howlgala dalal badan, iyo sidoo kale kala duwanaanshaha fasiraadda diinta Islaamka ee guud ahaan Soomaaliya. Ilaa xad, waxay meesha ka saartaa dhinaca ruuxiga ah, ama cibaadada ee Soomaalida, iyadoo wax walba lagu fasirayo muraayadda faa'iidada dhaqaale ee shaqsi ama koox. Waxaa jira faa'iidooyin uu helayo qofka ku biirayo ama taageeraya urur diimeed. Tusaale ahaan, shabakadaha diinta ayaa mararka qaarkood hoos u dhigaya qiimaha wax kala iibsiga ee ganacsiga; ururrada diinta iyo hoggaamiyeyaashooda ayaa inta badan loo arkaa inay yihiin kuwo la aamini karo; kooxaha diintuna waxay yeelan karaan awood dheeri ah oo looga gudbi karo dhibaatooyinka guud ee u baahan dadaal wadareed. Sikastaba ha ahaatee, aragtida daneysiga ku dhisan ayaa ku guul daraystay in ay sharraxdo xasilloonida ka dhex jirta ururrada diimeed marka loo eego ururrada kale ee siyaasadda iyo kuwa bulshada rayidka ah ee Soomaaliya. Tani waxay tilmaamaysaa hababka daacadnimada ee ka sar-

1. Christian Webersik, Stig Jarle Hansen and Adam Egal, 'Somalia: A Political Economy Analysis', report commissioned by the Norwegian Ministry of Foreign Affairs, 2018.
2. Eeg, tusaale ahaan, Medhane Tadesse, *Al-Ittihad Political Islam and Black Economy in Somalia: Religion, Money, Clan and the Struggle for Supremacy Over Somalia*, Addis Ababa: Meag printing enterprise, 2002.
3. Eeg, tusaale ahaan, Alex de Waal, 'Somalia synthesis paper', London School of Economics and Political Science, 2017.
4. Stig Jarle Hansen, Atle Mesøy and Tuncay Karadas, *The Borders of Islam*, London: Hurst, 2009.

reeya danaha gaarka ah, iyo dhowr xaqiiqo oo muhiim ah oo ku jira taariikhda Soomaalida oo laga yaabo in la ilduufo lafa-gureedka marka diiradda ka saaro 'raacidda lacagta'.

Midda saddexaad, reer galbeedka ka shaqeeya arrimaha bini'aadamnimada iyo siyaasadda ayaa inta badan shaki ka qaba isdhexgalka diinta iyo siyaasadda, taasoo keentay in ay rumeystaan in labadaas la kala ilaaliyo Soomaaliya marka la joogo, sida nidaamyadooda siyaasadeed oo kale.[5] Haddana, sida aan sii iftiimin doonno, kala-sooociddu waa wax aan macquul ahayn marka laga hadlayo xaaladda Soomaalida.

Midda afaraad, qaar badan oo ka mid ah ururrada diinta ee Soomaaliya ayaa si taxaddar leh u qariyay qaab-dhismeedkooda urureed, fikradahooda iyo xiriirkooda dibadda. Tani waxay qeyb ahaan ka dhalatay caburintii, xariggii iyo jirdilkii dhacay xilligii taliskii Siyaad Barre (1969-1991), sidoo kale qeyb ahaan waxaa sababay shakiga reer galbeedka iyo cabsida la xiriirta ciqaab uga imaan karta nidaamyada reer galbeedka. Natiijo ahaan, arrimahan iyo wararka marin habaabinta ah ee ku saabsan ururrada diinta ayaa inta badan soo shaac baxay.

Arrimahan oo is biirsaday waxay sababeen aqoon la'aanta ku saabsan sida diinta iyo ururrada diintu ay ula falgaleen dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee Soomaaliya iyo kuwa ka baxsan, iyo sidoo kale sida saxda ah ee ururrada diimeed loo dhisay. Warbixintani waxay doonaysaa inay buuxiso gaabiskaas aqooneed.[6] Iyadoo arrimahaas maskaxda lagu hayo, su'aasha muhiimka ah ee ka dhalanaysa yegleelidda hay'adaha dowladeed ee Soomaaliya ayaa ah doorka ay ka ciyaaraan kooxaha diinta iyo hoggaamiyayaasha diinta siyaasadda Soomaaliya, iyo heerka ay gaarsiisan tahay sida ay diintu u jiheyso horumarka, aragtida iyo ficillada kooxaha siyaasadda iyo siyaasiyiinta. Haddii aan la fahmin doorka diinta iyo saameynta ay ku leedahay siyaasadda Soomaaliya, way adkaanaysaa in si wax-ku-ool ah loola macaamilo ururrada diinta, ama la fahmo damaca saamileyda siyaasadda Soomaaliya ee ku xiran kooxahaas. Haddaba, iyadoo la isku dayayo in la sharraxo, ujeeddada ugu weyn ee warbixintan waa in la fududeeyo xiriir caalami ah oo miradhal ah in lala yeesho kooxaha diimeed ee Soomaaliya.

## Habka loo sameeyay cilmibaarista

Warbixintu waxay taxliilineysaa waraysiyo lala yeeshay culimaa'uddiin, iyo siyaasiyiin ku sugan Soomaaliya iyo qurbaha.[7] Dadka la wareystay waxaa ku jira dhowr qof oo kamid ah shaqsiyaadka ugu muhiimsan diinta iyo siyaasadda Soomaaliya. Culimaa'udiinka muhiimka ah ee la wareystay waxaa lagu go'aamiyay wareysiyo horudhac ah oo lala yeeshay dadka Soomaaliyeed ee kasoo kala jeeda beelaha iyo kooxaha dhaqan-dhaqaale, kuwaasoo lagu weydiinayay in ay sheegaan hoggaamiyeyaasha diinta ee muhiimka ah. Waxaan xaqiijinay in aan wareysanno hogaamiyaasha ugu daggan – hogaamiyeyaasha diinta ee saameynta qaran leh balse ka fogaada in ay siyaasadda iyo diinta kaga faalloodaan warbaahinta Soomaalida. Intaa waxaa dheer, waxa aan isku daynay inaan ka fogaanno eexda dadka deggan magaalooyinka, waxaana wareysi la yeelanay culumaa'udiinka caanka ka ah deegaannada miyiga ah ee Soomaaliya.

Innagoo isticmaaleyna wareysiyadan, oo ay weheliyaan qoraallo horey loo qoray iyo wareysiyo aan la yeelannay siyaasiyiin iyo xubnaha bulshada rayidka ah ee Soomaaliyeed, ayaan faham ka bixinnay ururrada diinta ee Soomaaliya iyo xiriirka ay la leeyihiin siyaas-

5. Jonathan Fox, *An Introduction to Religion and Politics: Theory and Practice*, London: Routledge, 2018.
6. Fox, *An Introduction*, 29.
7. Culimada Soomaalida ee ku nool dibadda waxa ay ka ciyaareen kaalin muhiim ah siyaasadda Soomaaliya, doodaha diimeed, iyo xitaa gargaarka bini'aadamnimo, waxa ayna muhiim u yihiin qaabeynta mustaqbalka Soomaaliya.

adda Soomaaliya. Waxaan sidoo kale sahminnay aragtida dadka aan wareysannay ee ku saabsan sida xiriirkan ay tahay in uu u shaqeeyo. Guud ahaan, aragtida dadka aan wareysannay (ee u dhawaa dhacdooyinka iyo ururrada la darsay) ayaa mudnaanta koowaad ee taxliil la siiyay. Intaa waxa dheer, xaqiijinta xogta ayaa xoogga la saaray, iyadoo, marka ay suurtagal tahay, xogta xaqiijinaysa laga raadiyay labo il ama ka badan. Tani waxay si gaar ah muhiim u ahayd marka la eego xaqiiqda ah in kooxaha diimeed ay sanadihii hore isku dayeen inay qariyaan qaab-dhismeedkooda urureed.

# 2. ISLAAMKA IYO SOOMAALIYA: DHAQANKA IYO CAQIIDOOYINKA FIKRADEED

Muuqaalka urur-diimeedyada Soomaaliyeed waxaa laga dheehan karaa taariikhda Islaamka ee dalka, waxaana si gaar ah looga dheehan karaa dhaqamadii soo jireenka ahaa ee fogaa iyo kuwa dhowba. Kahor inta aan loo gudbin dulmar ku saabsan ururrada Ikhwaan-ka iyo suufiyada ugu caansan ee maanta ka jira Soomaaliya, waxaa lagama maarmaan ah in la dul maro sooyaalka taariikheed iyo caqiidooyinka fikradeed.

### Shaafici iyo Suufiyada

Islaamku wuxuu soo gaaray Soomaaliya wakhti hore, iyadoo qoraayaal Carabeed ay ka qoreen warbixinno ku saabsan dowlado badan oo Islaami ah oo ka jiray xeebaha Soomaaliya qarnigii sagaalaad.[8] Islaam qaadashadii Soomaali badan oo ku nooleed miyiga waxay billaabatay markii ugu horreysay qarniyadii kow iyo tobnaad iyo labo iyo tobnaad.[9] Soomaalida guud ahaan waxay qaadatay mad-habta Shaaficiga ee Islaamka Sunniga, kaasoo ilaa maanta muhiim ka ah Soomaaliya. Dugsiga sharciga ee Shaafici wuxuu xoojiyaa doorka aasaasiga ah ee Qur'aanka iyo xadiiska (diiwaanka erayada, ficillada iyo oggolaanshaha aamusnaanta ee Nabi Muxammad (NNKH) ee aan lagu sheegin Qur'aanka) marka la gaaro xukunnada diimeed iyo kuwa siyaasadeed. Haddi ay ilahaasi u muuqdaan kuwo madmadow ku jiro, waxaa fasiraad laga raadsan karaa ijmaac (ijmaaca culimada Islaamka). Haddii aan la isku raacsanayn, dugsigu wuxuu isticmaalayaa qiyaas (sababeyn ku dhisan caqli).[10]

Mad-habka Shaaficigu waa mid aad u adag marka ay timaaddo ku dhaqanka xadiiska, iyadoo leh shuruudo cad cad oo ku saabsan diiwaannada la aqbali karo. Mad-habkaan fiqiga wuxuu ahaa walina yahay mid ka dabacsanaan badan dugsiga Xanbal ee markii dambe soo gaaray Soomaaliya (gaar ahaan, mad-habka hore (Shaafici) waxa uu oggol yahay adeegsiga ijmaaca iyo qiyaaska). Sidoo kale, ilaa xad, wuxuu la falgalay xeer dhaqameedka Soomaaliyeed.

Aqbalaadda xeerku sidoo kale waa tilmaan lagu garto Suufida, oo ah dhaqan kale oo diineed oo muhiim ah oo ka jira Soomaaliya. Dhaqanka Suufiyada ee Islaamka Sunni-

8. Magaalada Seylac iyo dhowr magaalo kale oo ay ka dhisnaayeen dowlado Islaami ah waxaa sheegay mid kamid ah dhul-mareennada carbeed kuwii ugu caansanaa qarnigii tobanaad, al-Maqdis (d. 990) buugiisa Carabiga ku qoran ee *Ahsan al-Taqasm fi Marifat al-Aqzaim*. Maqdis iyo ilo kale waxa ay sidoo kale sheegeen magaalooyin kale eek u yaalla xeebta. Eeg Mohamed Haji Mukhtar, 'Arabic Sources on Somalia', *History in Africa* 14 (1987): 141—172.

9. Hussein Mohammed Adam, 'Islam and Politics in Somalia', *Journal of Islamic Studies* 6/2 (1995): 189—221.

10. Wixii macluumaad dheeraad ah, eeg Noel James Coulson, *A History of Islamic Law,* Edinburgh: Edinburgh University Press, 1964. Waa in la ogaadaa in Soomaaliya ay si xooggan u saamaysay fiqiga Ashcariyah oo ah mid u dhexeeya diirad saarista caqli-galnimada iyo habka qoraalka ah kaasoo aysidoo kale, caan ku ahaayeen culimada Shaaficiga ee hore. Eeg Abdurahman Abdullahi, *The Islamic Movement in Somalia: A Study of the Islah Movement*. London: Adonis & Abbey, 2016, 20.

ga ah ayaa guud ahaan diiradda saaraya jaceylka Allaah, iyo suurtogalnimada in loogusoo dhawaado wanaagga iyadoo loo marayo cibaadaysi, duco iyo shucuur. Marka sidaas la sameynayo, suufiyadu waxay xoogga saartaa in Ilaah u dhowaadaan, waxayna aragti ahaan ka fogaadaan adduunka iyo xeerarka adag. Diiraddan la saaray dareenka ayaa u sahlay suufiyada in ay ku biiriyaan caadooyin fara badan oo Soomaalidu laheyd kahor Islaamka dhaqanka Suufida. Maanta suufiyadu waxay aad u ugu fidday dhulka miyiga iyo reer miyiga. Magaalooyinka, ururrada suufiyada ayaa dib-u-habeyn lagu sameeyay soddonkii sano ee u dambeeyay taasoo looga jawaabayay tartanka ururrada kale ee Islaamiyiinta, gaar ahaan Salafiyiinta. Taasi waxay keentay in la dhiso machadyo suufi ah oo casri ah, sida ururkii Macallin Nuur Maxamed Siyaad ee Muqdisho oo aasaasay Jaamacadda Imaamu Shaafici, hay'ad samafal, masaajido badan iyo boqollaal dugsiyo Qur'aanka lagu barto.

Suufiyadu waxay u qeybsantaa dariiqooyin: dugsiyada Suufiyada waxaa loogu magac daray hoggaamiyeyaal diineed – oo inta badan loo yaqaan murshid (*hagayaasha*) – kuwaasoo aasaasay dariiqooyinkaas. Erayga *'dariiqa'* macnihiisu waa dariiq, macnaha guudna waxa uu tilmaamayaa waddada waxbarashada. Dariiqo kastaa waxay tilmaameysaa mid kamid ah sheekhyada u gudbiyay aqoonta xubnaha cusub, gaar ahaan hababka loo baahan yahay si loo helo *xaqiiqada* (Runta ugu dambeeysa). Sidaas awgeed, dariiqa kastaa waa marinka fikradaha iyo hababka diinta ee ma ahan urur. Waxaa intaa dheer, inta badan dariiqooyinku waa kuwo aan gaar ahayn marka la eego xiriirka ay la leeyihiin hababka kala duwan ee Islaamka. Sida aan kor kusoo xusnay, dariiqa kasta waxaa badanaa loogu magac daray aasaasihii: tusaale ahaan, sheekha u dhashay Iiraan ee Cabdul Qaadir Gīlānī (1078-1166) waxaa loo arkaa inuu yahay aasaasihii dariiqada Qaadiriya, oo caan ka ah Soomaaliya. Gīlāni waxa uu ku saleeyey waxbarashadiisa labo dugsi oo kala duwan, Shaafici iyo Xanbali, taasoo muujinaysa in mad-habka Suufigu yahay mid ay ku jiraan mad-habyo dhowr ah.[11] Dariiqooyinka Qaadiriyada, Axmadiya iyo Saalixiyada ayaa ahaa dugsiyada ugu caansan Soomaaliya,[12] iyadoo Qaadiriyada ay sidoo kale caan ku ahayd soo saarista haweeneydii sheekhadda islaamka ee caanka ahayd ee Dada Masiti (1810s-1919). Suufiyada Soomaaliyeed ayaa weli siyaarta qabrigeeda oo ku yaalla magaalada Baraawe.

Suufinimadu waxaa aad caan ugu ah dabaqadaha dhexe iyo kuwa hoose ee Soomaaliya. Aqoon la'aantooda luuqadda Ingiriiska waxay keentay in laga reebo cilmibaarisyada lagu saameeyo ururrada islaamiyiinta ee casriga ah ee Soomaaliya. Dhaqanka Suufiyada ee ah in loo duceeyo hoggaamiyeyaasha dariiqada ee dhintay si Alle loogu dhawaado ayaa noqotay mid kala qeybisa iyaga iyo kooxaha cusub ee Islaamka Soomaaliya, gaar ahaan Salafiyiinta, kuwaasoo inta badan u arka in dhaqankaas uu yahay nooc kamid ah caabudidda sanamyada. Sababo lamid ah kuwaas, dhaqanka suufiyada ee ah in la booqdo uabuuraha sheekhyada suufiyada ayaa sidoo kale la isku khilaafsan yahay. Xiisadahaas ka dhex aloolsan Suufiyada iyo Salafiyiinta ayaa sabab u noqotay in Suufida ay dagaal kala kulmeen Al-Shabaab, taasoo keentay in Suufidu ay abaabulaan ururro hubeysan, sida *Ahlu Sunna Wal Jamaaca*.

11. Eeg Siddiq Osman Noor Muhammad, *Ghawth al A'zam Muhyiddin Shaykh 'Abdul Qadir Jilani, Rady Allahu Anhu*, Toronto: Iqra Publications: ma taarikheysna.

12. *Rifaaciyada dariiqa* ayaa sidoo kale xubno ku leh Soomaaliya. Waxaa xusid mudan in iyadoo *dariiqada* Saalixiyada mararka qaarkood la sheego inay kamid tahay *dariiqada* Qaadiriyada, ayaa waxaa horay u jiray khilaafyo soo kala dhexgalay, iyadoo *dariiqada* Saalixiyada ay qaateen mawqif aad ugasii weyn oo dib usoo nooleyn ah, oo ay astaan u tahay taariikhdii Sayid Maxamed. Abdullah Hassan, oo hogaaminayey jabhado firfircoon oo ka dhan ah Ingiriiska, Xabashida iyo Talyaaniga 1899-kii ilaa 1921. Xasan, isagoo ururka Saalixiya ka duulayo, haddana wuxuu ka goostay Saalixiyada ka baxsan Soomaaliya markii uu jabhadaynta ku jiray. Eeg Bradford G. Martin, *Muslim Brotherhoods in Nineteenth-Century Africa,* Cambridge: Cambridge University Press, 2003.

## Kuwii danbe: Salafiyiintii iyo Ikhwaaninimada

Qarnigii lasoo dhaafay, labo dhaqan oo Islaami ah oo mar dambe soo gaaray Soomaaliya ayaa magac ka dhex helay dadka bulshada ugu muuqda. Labada dhaqanba waxay ku faafeen xiriirka ay la leeyihiin qurbajoogta Soomaaliyeed, oo ay wehliso kaalmada ay ka helayeen Sacuudi Carabiya. Midda ugu horreysa oo ah Salafiyada waxay ku tiirsan tahay mad-habka Islaamka ee saameynta ballaaran ku leh noloshdaa diimeed ee Sacuudi Carabiya (oo inta badan loo yaqaan Wahabiyada). Iyadoo ay jirto in afkaarta al-Shabaab iyo Dowladda Islaamiga ay kasoo jeedaan culimada Salafiyiinta, haddana waa in aan Salafiyada lala simin labadan urur, loona arkin in ay yihiin kuwo rabshado wata.

Salafinimada waxaa saldhig u ah mad-habka Hanbali ee Islaamka Sunniga, oo ah dugsi aanan inta badan xoojin dhaqanka marka la fasirayo Qur'aanka iyo xadiiska. Sidaas oo ay tahay, Salafiyiintu waa kuwo aqbala xadiisyada aanay culimada Shaaficigu u arkayn in ay sax yihiin. Salafiyadu waxay, sidaas darteed, soo bandhigaan hab ka dabacsanaan badan xagga xadiiska marka loo eego habab kale oo badan oo Islaamka loo fasiro axaadiista. Sikastaba ha ahaatee, ma aaminsana isticmaalka *Ijmaaca* iyo *qiyaaska*, guud ahaan waxayna qabaan in Ijmaaca maanta aan la xoojinin, oo loo baahan yahay in si xarfi ah loo akhriyo *Qur'aanka* iyo *axaadiista*.[13] Tani way ku kala duwanaan karaaan culimadu, iyadoo ugu yaraan hal qof oo salafi ah oo aan wareysannay uu sheegay in *ijmaacu* yahay muhiim. Tani waxaa laga yaabaa inay muujiso tilmaan waaqificinimo oo ka dhex jirta qaar kamid ah culimada Salafiyiinta Soomaaliya.[14]

Inkastoo ay salafiyiintu ku andacoonayaan in dhaqankoodu uu dib ugu laabanayo asalkii Islaamka, haddana Salafiyiinta Soomaaliya waayadii hore waxaa ragaadiyay qabyaalad. Ururka *al-Itixaad al-Islaamiyah*, oo ahaa ururkii ugu weynaa ee Salafiyiinta Soomaaliya ee sagaashamaadkii, ayaa dhowr jeer qarka u fuulay inuu burburo, sababo la xiriira colaado qabiil.

Salafiyadu waxa kale oo ay la tartantay dhaqanka Islaamka ee dhawaanahan kasoo shaac baxay Soomaaliya ee Ikwhanka oo ah falsafadda diimeed ee ku salaysan Ikhwaanul Muslimiin. Soomaalida ikwhanka ahi waxay ku saleeyaan fikirkooda qoraalladii Xasan Al-Banna (14 October 1906—12 February 1949), kaasoo xoogga saaray Islaamka iyo bani-aadmigu inay yihiin kuwo ku saleysan sababeyn iyo caqli, taasoo iyaduna horseedda inay rumeystaan wax caqli-gal ah, taasoo keenaysa in noolaha leh caqli dhameystiran uu fahmi karo Islaamka uuna aqbalaayo in uu run yahay. Mabda'a muhiimka ah ee Ikwhanka waa in waxbarashadu ay kor u qaadi karto garaadka, sababeynta caqliga ku dhisan, iyo sidoo kale Islaamka. Sababtaas awgeed, waxbarashadu waligeed muhiim bay u ahayd Ikhwaanka, taasna waa tan maanta ka jirta Soomaaliya.

Ikwhaanka waxay aaminsan yihiin in caqli-galnimada sidoo kale lagu shaqeyn karo si si fiican loo fahmo Islaamka iyo shareecada, iyo sidoo kale lagu tirtiri karo caadooyinka soo jireenka ah ee Islaamka, iyadoo ku beddelaya (ilaa xad) fasiraad casri ah oo *Qur'aanka* iyo *Xadiiska*.[15] Ikhwaanku waxa ay dhaqankooda ku saleeyeen fahamka shareecada oo ka dabacsanaan iyo firfircooni badan marka loo eego salafiyiinta. Sikastaba ha ahaatee, waxaa xusid mudan, fikradda Ikhwan ee 1960-meeyadii, oo ku saleysaneyd qoraaladii Sayid Qutb, ayaa u weecatay meel u dhow fikirka Salafiga ee cambaareynta Muslimiinta kale. Inkastoo habkaan dood la geliyay, haddana dhaqanka Qutb waa uu kasii jiray

---

13. Christopher Melchert, *Ahmad Ibn Hanbal*, London: Bloomsbury, 2006.
14. Wareysi lala yeeshay sheikh Salafi ah X1.
15. Stig Jarle Hansen, Mohamed Gaas and Ida Bary, 'The Muslim Brotherhood in the Arab winter', Harvard Kennedy School of Governance discussion paper, September 2017, 13.

Soomaaliya, ilaa heerna, waxa uu ka muuqdaa ururrada waaweynaa ee Ikhwaanka ee Soomaalida, gaar ahaan *Aala Sheekh*.[16]

Salfiga iyo Ikhwaanka ka jira Soomaaliya aad bay isu dhex galeen. Labaduba marxaladdoodii hore waxaa taageeray Sucuudiga, iyadoo ardaydii iyo shaqaalihii soo laabtay Soomaaliya ee ka yimid Sucuudiga (iyo sidoo kale Suudaan) ay muhiim u ahaayeen labada dhaqdhaqaaq. Iska caabbin wadajir ah oo ka dhan ah xeerarkii qoyska ee Soomaalida 1975, taasoo keentay in la xiro tiro hoggaamiyeyaal diineed ah, ayaa sidoo kale horseedday xiriir ka dhexeeya labada urur. Muddo kadib, culimadii Salafiga iyo Ikhwaankuba waxay ka wada hadleen midow ay yeelan karaan, tusaale ahaan *al-Itixaad al-Islamiyah* (Salafiya) iyo *al-Islaax* (Ikhwaan). Waxaa kaloo jiray culimaa'udiin – laga yaabo in uu ugu caansanaa marxuum Sheekh Nuur Baaruud Gurxan – oo fikir ahaan labada fikir u dhexeeyay. Iyadoo ay taasi jirto, haddana dhaqamadii Salafiga iyo Ikhwaanku waa ay ahaayeen kuwo kala soocan, iyagoo dhidibada u taagay *al-Ictisaam* iyo *al-Islaax* – labo kamid ah urur diimeedyada ugu cimriga dheer Soomaaliya.

16. Hassan al-Hudeybi, Hagaha ruuxiga ah ee Ikhwaanul Muslimiin Masar (1951—1973), wuxuu qoray bug uu cinwaankiisu yahay 'We Are Preachers Not Judges' in response to the ideology heralded by Qutb. Eeg Barbara Zollner, *The Muslim Brotherhood: Hasan al-Hudaybi and Ideology*, London iyo New York: Routledge, 2009.

# 3. URRURADA IYO SHAKHSIYAADKA UGU MUHIIMSAN

Soomaliyada maanta waxaa jira urruro caan ah, kuwaasoo ka dhashay Ikhwaanka, Salafiyadda iyo Suufiyadda. Waxaa jiray kala qeybsanaan weyn oo u dhexeysay inta badan urruradan, kuwaasoo mararka qaar isku rogay dagaal furan, kala tag iyo urruro cusub oo ayaga kasii hoos dhashay. Sikastaba, ayaga oo ah qeyb firfircoon oo bulshada Soomaaliyeed kamid ah, haddana waxa ay u muuqdeen kuwo ka sal adag marka la eego xisbiyada siyaasadda, ama kooxaha hubeysan. Arrintaasna waxaa laga arki karaa, kooxaha ku dagaallamayay dagaalkii sokeeye ee Soomaaliya 90-meeyadii iyo xisbiyaddii siyaasadda ee xilligaas midkoodna ma jiro, halka inta badan kuwa ugu muhiimsan urrur diimeedyada Soomaaliya ee jiritaankoodu soo bilowday xilliyadaas iyo xitaa ka horba ay weli sii jiraan. Sadarada hoose ee warbixintan waxa aan kusoo bandhigeynaa dulmar ku saabsan urur diimeedyada waaweyn ee hadda si muuqata uga howlgala Soomaaliya.

### *Al-Islaax* (Ikhwaan)

Ikhwaan Muslimiinku waxa uu jiray kahor inta aanay Soomaaliya xornimaddii qaadan. Xilliyadaas, Ikhwaanka waxa uu qeyb ka ahaa abuubulka guud ee lagu raadinayay in lagu xoreeyo Soomaalida, laakiin ururka Ikhwaanku fikirkii gobonimo-doonka ahaa inuu aad ugu dhex milmo uma suuragelin. Ururka Ikhwaanka garabkiisa Soomaaliya oo ah *al-Islaax* waxaa la sanadkii 1978 lagu aasaasay magaalada Riyaadh ee Sacuudiga. Waxaana aasaasay shan qof oo arrimaha diinta u dhaqdhaaqa oo lagu qasbay in ay dalka dibadiisa ku noolaadaan oo ay sabab u aheyd is-af-garan waa dhex maray hoggaamiyeyaasha diinta iyo Siyaad Barre, kaasoo la xiriiray xeerka qoyska Soomaaliya ee soo baxay 1975, iyo qeyb ahaan ayagoo go'aansaday in ay Sacuudiga u safraan si ay shaqo uga helaan. Xubnaha aasaasay ururka intooda badan waxa ay ku lug lahaayeen Ururrada Ikhwaanka kale ee Suudan iyo Sacuudiga.[17]

Iyadoo ay muhiim u aheyd faafinta diinta Islaamka iyo aragtida Ikhwaanka, haddanaururkan cusub waxa uu doonayay inuu sameeyn ku yeesho siyaasadda islamarkaana dhaqaaq isbeddel ah ka sameeyo gudaha Soomaaliya. *Al-Islaax* aad ayuu u dhaliili jiray maamulka Siyaad Barre, gaar aahaan kadib hirgelintii xeerka qoyska ee 1975 iyo ka saaridddii dastuurka laga saaray diinta Islaamku in ay marjac u tahay dastuurkii la sameeyay 1979. Arrintaas waxaa ka dhashay in xukunka Siyaad Barre uu sameeyay isku dayo uu ku cadaadinayo ururka. Si ay uga badbaadaan arrinkaas, *al-Islaax* waxa ay sameysteen shabakado qarsoon, kuwaasoo ka dhigtay ururkaan mid arrimahiisa qarsoodi yihiin. Inkastoo laga yaabo maanta in ururkani yahay midka ugu daahfuran ururrada Islaamiga ah ee Soomaaliya, haddana sirtu waa u muhiim. Ururka waxa uu aasaasay hannaan baahsan oo arrimaha samfalka ka shaqeeya, halkaasoo inta badan xubnaha sare ee hannaanka samfalka ay yihiin kuwo aan *al-Islaax* ka mid aheyn, halka qeyb yar oo xubna-

17. Abdullahi, *The Islamic Movement in Somalia*; Stig Jarle Hansen and Atle Mesøy, 'The Muslim Brotherhood in the wider horn of Africa', NIBR Report, 2009, 33.

ha ah ay *al-Islaax* ka imaanayeen. Dadaalladda arrimaha bini'aadamnimada ah ee *al-Islaax* ayaa waxa ay ahaayeen kuwo saameyn leh, si lamid ah sidii ay isku dayo dhanka dib-u-heshiisinta u sameeyeen iyagoo dhisay Golaha Dib-u-heshiisiinta Soomaaliyeed kaasoo shaqeynayay illaa iyo 2006.[18]

Markii hore, *al-Islaax* waxa ay si joogta ah u qoran jireen dadka haldoorka ah iyagoo isku xisaabinayay in aanay aheyn urur iska caadi ah balse ay yihiin urur hoggaan u ah ummadda oo isku dayaya inuu isbeddel ku sameeyo bulshada Soomaaliyeed qeybaheeda kala duwan. Inkastoo uu ururka lahaa dad badan oo la dhacsan, haddana diidmadaa *al-Islaax* ee ah in ay ku biirto qorshihii Xasan Al-Turaabi[19] ee ahaa in la abuuro urur Afrikaanka Muslimiinta ah oo dhan ay ku mideysan yihiin ayaa kordhisay magaca *al-Islaax* ay ku laheyd ikhwaanka Masar. Sidoo kale, waxa ay keentay in *al-Islaax* si rasmi ah loo aqoonsado oo loo oggolaado in ay qeyb ka noqdaan qaab-dhismeedka ururka ikhwaanka caalamiga ah sanadkii 1987. Intaa waxaa dheer, *al-Islaax* waxaa laga siiyay kursi golaha *shuurada* ee caalamiga ah.[20] Inkastoo ururku uu lahaa hannaan liita oo xagga la talinta iyo isku-dubaridka ah, haddana *al-Islaax* waxa ay heshay magac iyo in ay xiriir la yeelatay caalamka. Keliya ma aheyn in wakiilkooda Cali Sheekh uu ahaa mid aad looga yaqaano ururada Ikhwaanka, ee *al-Islaax* waxa ay aheyd xubinta keliya ee ka socota dalalka Afrika ee Saxaraha ka hooseeya ee xubin ka ah golaha.[21] Mararka qaarna waxa ay helaayeen dhaqaale uga imaan jiray faracyada kale ikhwaanka iyo samafalka.

*Al-islaax* waxa ay abuureen dhaqan ah hoggaankooda in ay si dimuqraadi ah u doortaan, iyadoo loosii marayo go'aan ka yimaado Golaha *Shuurada* ee caalamiga ah, ururku waxa uu muujiyey ka go'naansho in si dimuqraadi ah hoggaanka loo doorto.

Kadib burburkii dalka, xubno *al-Islaax* ah ayaa billaabay in ay si gaar ah u xulufeystan *al-Itixaad al-Islaamiya*. Sikastaba, isku dayadii la sameeyay ee ahaa in la wada shaqeeyo waxa ay ugu dambeyntii kiciyeen loollan dhex mara labada urur. Markii ay *al-Islaax* isku dayday in ay la shaqeeyso *al-Itixaad al-Islaamiya* sanadkii 1989, dano shaqsiyadeed oo isdiidan iyo kala duwanaansho xagga caqiidada ah ayaa si degdeg ah usoo afjaray dedaalladii wada shaqeynta lagu abuurayay. Kahor inta aysan dowladda burburin, isku-day kama dambeys ah oo lagu dhisayo madal mideysa ururada Islaamiga ah oo ay hoggaminayeen *Majmaca Culimadda*, kaasoo uu hoggaankiisu ahaa Sheekh Maxamed Macallin, ayaa guuldarreystay. Turaabi ayaa mar kale isku dayay in uu isku keeno labada dhinac sanadkii 1992, balse *al-Islaax* ayaa ka cabatay in *al-Itixaad* ay adeegsaneyso maleeshiyaad hubey-

18. Hansen and Mesøy, 'The Muslim Brotherhood in the wider horn of Africa'.
19. Hassan al-Turabi (1932—2016), Hoggaamiyaha awoodda badan ee Jabhadda Islaamiga ah ee Suudaan (NIF), waxa uu ahaa mufakir iyo dhaqdhaqaaqe muhiim ah oo isku dayay in uu midnimo ka dhex abuuro Islaamiyiinta heer caalami.
20. Golaha *shuurada* caalamiga ah waxaa la aas aasay 1982 si ay isugu duba ridaan doodaha afkaarta, waxayna yeesheen *shuurada* guud, al-Murshid (hagaha), iyo golaha haga. Turabi ayaa markii hore kasoo horjeestay ururkan cusub. Kadib, goluhu waxa uu la kulmay mucaaradad dhawr urur oo muhiim ah, tusaale ahaan Ikhwaanka Kuwaiti, oo ka gadooday kadib dagaalkii koowaad ee Khaliijka, kaasoo goluhu u xaglinayay Ciraaq. Ikhwaanka Ciraaq ayaa sidoo kale diiday hagidda golaha markii kii hore uu go'aansaday inuu ka qeyb qaato geeddi-socodkii siyaasadeed ee Ciraaq kadib duulaankii Mareykanka ee 2003. Inkastoo xiriirka caalamiga ah ee ururrada Ikhwaanku uu ahaa mid dabacsan, haddana waxa ay awoodeen in ay qaataan go'aammo wadajir ah – sida in dimoqraadiyadda laga dhigo hadaf guud 1998. Eeg Hansen, Gaas and Bary, 'The Muslim Brotherhood in the Arab winter', 15.
21. Hansen, Gaas and Bary, 'The Muslim Brotherhood in the Arab winter', 15.

san. Eedda *al-Islaax* ay usoo jeedisay ee ah aragtida mayalka adag ee *al-Itixaad* ayaa aheyd farqi muhiim ah oo taagnaa illaa *al-Itixaad* ay ka burburtay dhamaadkii 90-maadkii.[22]

Qaab-dhismeedka baahsan ee *al-Islaax*, iyo dhaqaalaha ugasoo xarooda dalalka kale iyo qurbajoogta Soomaalida ee xubnaha ka ah waxa ay gacan ka geysteen si jiritaanka ururka iyo in ay awood u siisay inuu badbaado xilligii dagaallada sokeeye ee 1990-meeyadii. Bilowgii 1990-meeyadii, ururka *al-Islaax* waxa uu diiradda saaray dib-u-heshiisiinta kooxaha dagaallamayay iyo ballaarinta howlaha Islaamiga ah, isagoo sii waday howlaha gargaarka iyo waxbarashada. Ururku sidoo kale waxa uu billaabay barnaamij uu ugu magac daray 'la falgelidda xaqiiqda', kaasoo u oggolaaday xubnaha ururka in ay ka qeyb galaan dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee beelaha ku dhisan. Intaa waxaa dheer, horraantii 90-meeyadii *al-Islaax* waxa ay u dirtay deegaannada fog ee miyiga kooxo kala duwan oo farrin-sideyaal xagga nabadda ah, kuwaasoo dadka kala hadlayay arrimaha nabadeynta deegaannada. Ururku sidoo kale waxa uu aasaasay 1994 *Golaha Musaalaxada* oo kor lagusoo xusay, kaasoo shaqeyanayay illaa sanadkii 2006. Intii lagu guda jiray dagaalkii afar biloodka ee u dhexeeyay Cali Mahdi iyo Maxamed Faarax Caydiid oo Muqdisho ka dhacay 1992, xubnaha Golaha Musaalaxada waxa ay si joogta ah isugu dayeen in ay heshiisiiyaan labada dhinac ee dagaallamayay. Intaa waxaa dheer, sida uu noo sheegay xubin ka tirsan *al-Islaax,* Golaha Musaalaxada waxa uu sidoo kale kaalin ku lahaa dadaalladii ururada bulshada rayidka ee lagu qaaday 70 isbaaro oo Muqdisho yaallay.[23] Si marka loo eego, dagaalladii sokeeye waxa ay *al-Islaax* ka weeciyeen siyaasadda, iyadoo uu ururka kordhiyay dhaqdhaqaayada xagga nabada iyo dib-u-heshiisiinta, iyo howlaha samafalka. Iyadoo arrinkan qeyb ka ah, Golaha Musaalaxada ayaa xubin ka noqday Shabakadda Isku Xirka Nabadda iyo Xuquuqda Aadamiga ee INXA oo aheyd shabakaddii ugu horreysay ee bulshada rayidka Soomaaliya oo la aasaasay sanadakii 1997.

Dadaalladii *al-Islaax* ee nabadda iyo dib-u-heshiisiinta ayaa waxa ay siisay ururka fursad uu dib ugu laabto saaxada siyaasadda isagoo ku lug yeeshay hannaankii dib-u-heshiisiinta Carta ee 1999—2000. *Al-Islaax* waxa ay ka cayaartay kaalin muhiim ah abaabulka wadadallada, ayadoo Cabdiraxmaan Baadiyow oo ahaa guddoomiye ku-xigeenka markii dambena noqday af-hayeenka ururka uu qeyb ka ahaa Geedi-socodka Nabadda Soomaaliya, isagoo kala talinayay dhanka farsamada hannaanka dib-u-heshiisiinta. Xubno kale oo fara badan oo *al-Islaax* ah ayaa si xooggan ugu lug lahaa shirka.[24] *Al-Islaax* ayaa heshay 10 boqolkiiba xubnaha baarlamaanka, iyadoo Ibraahim Dasuuqi oo ahaa xubin firfircoon ee katirsan *al-Islaax*, tusaale ahaan, loo magacaabay hoggaanka guddiga arrimaha dibadda.[25] Itoobiya ayaa cambaareeysay hannaanka dib-u-heshiisiinta ee Carta oo Jabuuti u arkeysay in ay loollan kula jirto dadaalladeeda arrimaha nabadeynta Soomaaliya, iyo iyadoo hoggaamiye kooxeedyada aan sidoo kale la siinin wax kuraas ah. Dadaallada *al-Islaax* ee shirka waxa ay sare u qaadeen magaca ururka, waxa ayna taasi soo dedejisay in si khalad ah loogu xagliyo ururka *al-Islaax* inuu ka dambeeyo dhismaha dowladda Carta. *Al-Islaax* waxaa loo arki karaa in ay saameyn illaa xad ku lahayeen

22. 1989kii, *al-Itixaad al-Islamiyah* wuxuu uga dhawaa Turaabi *al-Islaax*. *Al-Islaax* waxa uu ka shakiyey Turaabinimada iyo in uu aad ula saaxiibo Ikhwaanka Masar. Dhanka kale, *al-Itixaad al-Islaamiyah* wuxuu lahaa mid Wahaabiyad-Salafiya ku xooggan tahay. Dhowr xubnood oo hore uga tirsanaan jiray *al-Islaax* ayaa horay uga tagay ururka si ay ugu biiraan *al-Itixaad al-Islamiyah*, oo uu ku jiro hoggaamiyihii *al-Itixaad al-Islamiyah* Sheekh Cali Warsame, taasoo sii kordhisay cadaawad. Waxa kale oo muhiim ah kala duwanaanshahooda urureed: *al-Itixaad al-Islaamiyah* markii horeba aad buu u kala qeybsanaan jiray, sidaas darteedna waxa ay dhibaato kala kulmeen in ay hal af ku hadlaan. Eeg: Hansen, Gaas and Bary 'The Muslim Brotherhood in the Arab winter', 15; Abdurahman Abdullahi, *Al Islax Movement in Somalia*, Mogadishu: Hiraan, 2008.

23. Wareysi lala yeeshay xubin katirsan *al-Islaax* Sheikh x3.

24. Hansen and Mesøy, 'The Muslim Brotherhood in the wider horn'.

25. Wareysi lala yeeshay sheikh katirsan al-Islaax x4.

shirka, waxaana laga arki karaa dastuurka kasoo baxay shirka Carta oo ahaa dastuur aad ugu janjeera diinta Islaamka markii ugu horreyasay taariikhda Soomaaliya.[26]

*Al-Islaax* waxaa sidoo kale saameyn weyn ku yeeshay howlihii La Dagaallanka Argagixisada, oo Itoobiya loo adeegsaday si ay u beegsato ururka, iyadoo ugu darnaaneysa kaalintii uu ururka ku lahaa shirkii Carta. *Al-Islaax* badanaa way ku wareeraan ururrada Islaamiga ah ee dibadda, iyagoo ku guuldareystay in ay gartaan mabda'a *al-Islaax*. Arrintan waxa ay keentay in ururka uu diirad weyn saaro ilaalinta sirta ururka, taasoo malaha keentay in kaalinta *al-Islaax* ee shirarkii dambe ee dib-u-heshiisiinta ay daciif noqoto.

Kala qeybsanaanta ugu weyn ee *al-Islaax* soo martay waxa ay dhacday 2006-2007 kadib markii koox (ku dhowaad 300 xubnood) ay ka tageen ururka si ay u aasaasaan garabka *Dam Jadiid* (Dhiigga Cusub). *Al-Islaax* ayaa markii dambe wajahay kala qeybsanaan labaad kadib markii Sheekh Maxamed Yusuf iyo Sheekh Maxamed Garyare – oo labadaba kamid ahaa xubnaha aasaasayaasha – ay ku biireen *Dam Jadiid*, inkastoo ay islamarkiiba ka bexeen *Dam Jadiid*. Inkastoo maanta uu jiro ugu yaraan hal xisbi siyaasadeed oo ay qeyb ahaan aasaaseen xubno ka muuqda ururka *al-Islaax* (*Xisbiga Midnimo-Qaran*) – haddana ururku ma laha xisbi isaga u gaar ah. *Al-Islaax* ma aqoonsana in ay xisbi siyaasadeed xiriir rasmi ah la leeyihiin, inkastoo xubno kamid ah ururka ay u dhawaayeen raysal wasaarihii hore Xasan Cali Kheyre saameyna ku lahaayeen magacaabisyo uu sameeyay.

Ururka waxa uu si xooggan ugu lug lahaa arrimaha waxbarashada Soomaaliya, waxa uuna ku guuleystay in ay gabdhaha wax bartaan. Sidoo kale waxa uu helay dhaqaale badan oo xagga samafalka ah, taasoo ay ugu wacaneyd in xubnaha ururka qaarkood ay waxbarasho sare kusoo qaateen wadamadda Galbeedka. *Al-Islaax* ayaa xiriir dhaw la leh tiro kamid ah ururrada ikhwaanka ah ee caalamka, gaar ahaan garabka Yemen iyo Kuweyt, iyadoo ururka Kuweyt uu ku deeqay dhaqaale samafal oo mashaariic bini'aadamnimo looga fuliyay Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, ururka waxaa tobankii sanadood ee ugu dambeeyay saameyn weyn ku yeeshay hab-fekerka liberaalka ah ee aqoonyahanka Tuniisiyanka ah Rashiid Ganuushi. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la ogaado *al-Islaax* in uu yahay urur ka jira gobolka qeybahiisa ay Soomaalidu degto sida Jabuuti, Itoobiya iyo Kenya. Waxaa sidoo kale xubno ka ah qurbajoog ballaaran oo Soomaali ah. Ururka waxaa loo qaabeeyay hannaan baahsan, waxaana qeyb walba, oo ay ku jirto Soomaalida dibadaha ku nool, ay raacan xeerar guud oo ku jira manhajka waxbarashada ururka, laakiin qeyb walba waxa ay ku dabaqdaa xaaladda dalka ay qeybtaasi ka howlgasho.

### *Dam Jadiid* (Ikhwaan)

Sida kor lagusoo sheegay, *Dam Jadiid* waa garab ka baxay *al-Islaax*, kadib khilaaf ururka dhexdiisa ah. Sida lagasoo xigtay goobjooge, khilaafkan ayaa soo ifbaxay markii ugu horreysay sanadkii 1995.[27] Kooxda sameeyay *Dam Jadiid* ayaa doonayeen in ay si toos ah ula shaqeeyaan dhaqdhaqaaqii maxkamadaha, islamarkaana waxa ay taageereen in la galo dagaal looga hortagayo faragelinta Itoobiya, halka inta badan xubnaha *al-Islaax* ay kasoo horjeesteen aragtida ceynkaas ah. Khilaafkan waxaa sii xoojiyay xiisadihii u dhexeeyay xubnihii kala joogay dalalka Galbeedka iyo Khaliijka, iyo sidoo kale kooxda markii dambe aasaastay *Dam Jadiid*. Xiisaduhu waxa ay cirka isku shareereen 2003 kadib markii koox yar ee *Dam Jadiid* ah ay ku guuldareysteen in ay xubno ku yeeshaan golaha *shuurada al-Islaax* kadib doorasho dhacday, islamarkaana ay go'aansadeen in ay sameystaan urur u gaarka ah. Intaa waxaa dheer, dhaqdhaqaaqa cusub waxaa ku jiray hoggaamiye diimeedyo horey uga tagay *al-Islaax* sida Sheekh Nuur Baaruud Gurxan, kaasoo

26. Hansen and Mesøy, 'The Muslim Brotherhood in the wider horn'.
27. Wareysi lala yeeshay sheikh katirsan *al-Islaax* X4.

markiisii horeba ay ku yareyd Ikhwaaneynta, islamarkaana u janjeeray fikirka Salafiga. Kala qeybsanka *al-Islaax* waxa uu si muuqata usoo if-baxay 2006-2007.

Xubnaha kooxda go'day ayaa waxaa ay sii go'doomiyeen Ikhwaanka calaamka iyagoo maqaal ku daabacay bogga internetka Ikhwaanka Masar, sheegtay-na in ay yihiin hoggaanka cusub ee *al-Islaax*. Hoggaanka Sare ee Ikhwaanka Masar Akef oo ka jawaabaya arrinkaas ayaa sheegay in sheegashada *Dam jadiid* ay tahay mid waxba kama jiraan ah, isagoo hoosta ka xarriiqay in hoggaanka garabka *al-Islaax* qadiim ay yihiin hoggaanka saxda ah, *Dam Jadiid*-na aysan shaqo ku laheyn Ikhwaanka.[28]

Inkastoo *Dam Jadiid* uu weligiis ahaa urur si qarsoodi ah u qaabeysan, haddana markii ay saameyntooda soo muuqatay waxa ay aheyd xilligii madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud ee 2012-2017, gaar ahaan xubnaha uu xilalka uu magacaabay. Waxaa la sheegaa in wasiirkii cadaaladda ee madaxweyne Xasan Faarax Cabduqaadir iyo wasiirkii arrimaha gudaha Cabdikariin Xuseen Guuleed ay xubno ka ahaayeen *Dam Jadiid*, inkastoo ay si cad u diideen. Sikastaba ha noqotee, saameynta *Dam Jadiid* ayaa burburtay kadib markii Xasan Sheekh Maxamuud looga guuleystay doorashadii madaxweynaha 2017, iyadoo tiro hoggaamiyeyaal ah sida marxuum Sheekh Nuur Baruud Gurxan ay go'aansadeen in ay la xulufoobaan madaxweynaha cusub Maxamed Cabdullahi Maxamed 'Farmaajo'. Maxamed Xuseen Rooble oo noqday raysal wasaare sanadkii 2020-ka ayaa la sheegaa inuu qeyb ka ahaa shabakadda *Dam Jadiid*, inkastoo uu inkiray marar badan sida dad badan oo aan daraasaddan ku wareysannay ay sheegeen.

Marka dib loo eego, tobankii sano ee tagtay, sooyaalka ururku waxa uu u muuqdaa in uu si joogta ah uga faa'iideystay fursada, xiriir wanaagsan la yeeshay Qatar, iyo in uu ku dadaalay helista awoodda siyaasaadda. Shabakadda ururka ee qarsoodiga u sameysan iyo qaab dhismeedkiisa aan sugneyn waxa ay sababeysaa in ay adkaato in xaaladda urur ahaan ee *Dam Jadiid* la qiimeeyo, iyo dabcan in la ogaado yaa kamid ah ama aan ka mid aheyn – inakastoo ay xubno ku leedahay baarlamaanka hadda jira. Hoggaanka ururka ee hadda waa Cumar Daahir, halka hoggaamiyeyaasha ruuxiga ah ay yihiin Sheekh Cusmaan Ibraahim iyo Dr Maxamed Xaaji (hoggaamiye kale waxa uu ahaa Sheekh Nuur Baaruud Gurxan oo geeriyooday sanadkii 2021). Sida uu sheegay Sheekh caan ah oo Muqdisho jooga, ururku hadda waxa uu adeegsadaa magaca *Mu'tamar Al-Tanmiya*.[29] Marka la eego cidda ay ka helaan dhiirrigelinta, xubnaha *Dam Jadiid* waxa ay lamid yihiin *al-Islaax* iyagoo weli ku xeran mufakiriinta xagga diinta ee Ikhwaanka, inkastoo ay u muuqdaan kuwo iska fogeynaya ikwaanka kadib markii uu ikhwaanku wajahay dibu-dhacyo kadib kacdoonkii Guga Carabta. Marka la eego *al-Islaax*, hab fikirka aqoonyahanka Tuniisiyaanka ah Rashiid Ganuushi – oo ah ilaa xad mid u furfuran kaalinta haweenka ee siyaasadda, islamarkaana ay ka go'antahay dimuqraadiyada – ayaa si gaar ah muhiim u ah, inkastoo aragtiyadiisa qaar ee ku aaddan dumarka aanan si dhammeystiran loo aqbalin (xubnaha qaar ayaa diiddan, tusaale ahaan, in Soomaaliya ay yeelan karto haweeney madaxweyne ah).

### *Aala Sheekh* (Ikhwaan)

*Aala Sheekh* waxaa aasaasay Sheekh Maxamed Macallin, oo caan ku ahaa wacdigiisa masaajidka Sheekh Cabduqaadir ee 1970-meeyadii, islamarkaana sagaal sano oo ka billaabatay 1976 maxbuus usoo ahaa maamulkii Siyaad Barre.[30] Xilliga uu xabsiga ku jiray ayuu Sheekh Maxamed isku dayay inuu heshiisiiyo ikhwaanka iyo Salafiyada, sida lagasoo xigtay xubin *Aala Sheekh* ka tirsan oo lagu wareystay warbixintan oo sheegay in *Aala*

28. Hansen and Mesøy, 'The Muslim Brotherhood in the wider horn', 56.
29. Wareysi lala yeeshay sheekh caan ah X4.
30. Wareysi lala yeeshay sheekh caan ah X5.

*Sheekh* qeyb ahaan uu ka dhashay dadaalladan.[31] Urukan ayaa waxaa uu udub dhexaad u ahaa fikirka ikhwaanka, weliba ayadoo ay suuragal tahay in ay aad ugusii dhaw yihiin qoraallada Sayid Qudub, waana urur ay xubnaha ugu badan yihiin dadka ku nool gudaha dhulka Soomaalida. Inkastoo uu Sheekh Maxamed ka qalin jebiyay Jaamacadda Al-Azhar ee Masar, ururka xiriirradiisa arrimaha dibadda ayaa ah mid liita. Qaar ka tirsan *Aala Sheekh* ayaa sidoo kale ku biiray Midowga Maxkamadaha Islaamiga sanadkii 2006.

Wakhtigan, *Aala Sheekh* ayaa ah urur ay xubno ka yihiin inta badan beesha Hawiye. Xisbiga siyaasadda ee Daljir oo ay makii hore aasaaseen *Aala Sheekh* ayaa hadda qeyb ahaan kamid ah Xisbiga Midowga Nabada iyo Horumarinta, oo isaguna leh xubno *Dam Jadiid* ah. Xubno kamid ah *Aala Sheekh* ayaa waxa ay ku lug lahaayeen maamulka Jaamacadda City ee Muqdisho iyo warbaahinta Goobjoog. Ururka sidoo kale waxa uu saameyn ku lahaa hannaanka dhismaha dowlad goboleedka Galmudug. Intaa waxaa dheer, xubno *Aala Sheekh* ah ayaa loo arkaayay in ay aad ugu dhawaayeen madaxweynihii hore Shariif Sheekh Axmed (2009-2012). Xubno ka tirsan ururka ayaa loo maleynayaa in ay weli xiriir la leeyiihiin xisbiga uu hoggaamiyo Shariif Sheekh Axmed ee *Himilo Qaran*.[32]

### *Al-Ictisaam* (Salafi)

*Al-Ictisaam (al-Ictisaam Bil Kitaabi Wa Sunna)* waxa ay kasoo askumeen ururkii caanka ahaa ee *al-Itixaad al-Islaamiyah*, kaasoo la sameeyay sanadkii 1983 kadib midowga tiro ururo diimeed ah. Habka soo gudbinta fikirka iyo mabda'a *al-Ittixaad al-Islaamiyah* ayaa aheyd mid yara jahwareer leh, iyagoo aad ugu xirnaa fikirka Salafiga ayaa haddana waxaa saameyn ku lahaa ururka Ikhwaanka iyo Xasan Turaabi. Inkastoo ururka *al-Ittixaad al-Islaamiyah* aad loogu yaqaannay ardayda Muqdisho dhammaadkii 1980-meeyadii, sanadihii hore ee dagaalka sokeeye waxa soo baxday kala qeybsanaan xagga ururka ah. Arrinkan ayaa waxaa loo aaneeyaa la kala safashada beelaha, iyo khilaaf dhanka sidii looga falcelin lahaa dagaalka sokeeye ah. Qaarkood ayaa doonayay in ay ka dhowrsadaan dagaalka halka qaar kale ay qabeen in xitaa al-Qaacida lagu casuumo Soomaaliya si ay tababarro u siiyaan. *Al-Ittixaad al-Islaamiyah* ayaa sidoo kale Puntland kala kulantay guuldarrooyin iyo dib-u-dhacyo xagga militariga ah sanadihii 1991-1993, iyo Gedo sanadahii 1996 iyo 1998-1999. Ugu dambeyntii, xiisadaha gudaha ururka ah iyo guuldarrooyinka xagga militariga ah waxa ay keeneen in ururuku burburo 1998-1999.

Kooxihii dhashay kadib burburka ururka waxaa kamid ahaa *al-Ictisaam*, oo markii hore uu hoggaaminayay Sheekh Maxamuud Ciise. Sida aan kasoo xigannay xubno ururka u dhaw oo aan wareysannay, *al-Ictisaam* waxa uu ahaa urur Salafi ah balse iska diiday in uu dagaallamo. Sikastaba, xubno kamid ah – ama ugu yaraan xubno u janjeera ururka – sida Sheekh Maxamed Cabdi Umal ayaa oggolaaday in gacan ka hadal la adeegsan karo si looga jawaabo soo gelidda ciidamada Itoobiya ee 2006-2009 soo farageliyeen Soomaaliya, islamarkaana taageeray Maxkamadaha Islaamiga ah ee Muqdisho (inkas-

31. Wareysi lala yeeshay sheekh caan ah X6.
32. Heritage Institute, 'Response to Monitoring Group Allegations', July 2013. (www.heritageinstitute.org/response-to-monitoring-group/)

too uu Maxamed Cabdi Umal iska fogeeyey al-Shabaab).[33] Sida uu sheegayo mid ka mid culimada ururka *al-Ictisaam*:

> Ururku waxa uu asal ahaan abuubulkiisa kasoo bilowdaa masaajidada iyo xarumaha diiniga ah [dugsiyada Qur'aanka, jaamcoadaha, iyo mu'sasaadka waxbarashada]. Ururku waxa uu diiradda saaraa inuu faafiyo sida saxda ah ee uu Islaamku qabo, isagoo u maraya jameecooyin, isagoo dhisaya hay'ado waxbarasho sidoo kalena qabanaya kulamo iyo shirar sanadeedyo.[34]

Wakhtigan, *al-Ictisaam* waxaa hoggaamiya Sheekh Bashiir Axmed Salaad, oo kusoo wax bartay dalka Bakistaan. *Al-Ictisaam* waa urur ay leeyihiin madaxyo-weyn: xubnaha ururka ayaa badanaa ah dad mutacallimiin ah, sidoo kalena xiriir wanaagsan dhanka dibadda la leh taasoo badanaa ku timid waxbarashadii ay dibadda kusoo qaateen. Qaar kamid ah xubnaha ururka ayaa waxaa saameeyay qoraalladii culimada Sacuudiga sida Cabdi Casiis Ibnu Cabdillaahi Ibnu Baaz (1910-1999), muftigii hore ee Sacuudiga, iyo Maxamed Ibnu Al-Cutheymiin (1925-2001). Culimo kale oo dhowr ah ayaa xiriir dhaw la leh macallimiintooda dibadda joogta. Marka laga hadlayo arrimaha dumarka oo ay ku jirto in haween ay wadi karto gaari iyo in kale, culimada ururkan weli waa kuwa ku adadag. Qaar ururka ka tirsan, sida Sheekh Maxamed Cabdi Umal, ayaa aad ugasoo muuqda warbaahinta, islamrkaana doodo kulul is dhaafsadaan culimada Suufiyada. Arrinkan ayaa waxa uu sababay iskudhacyo keenay, tusaale ahaan, in mid kamid ah muxaadarooyinka Sheekh Umal oo uu Muqdisho ku qaban lahaa bishii November 2019 la joojiyay sabab la xiriirta Suufiyada oo ku cadaadisay dowladda in la baajiyo. Inkastoo *al-Ictisaam* ay leeyihiin xiriir ballaaran oo xagga qurbajoogta ah, gudaha Soomaaliya ururku kuma laha dad tiro badan oo raacsan – gaar ahaan dadka dabaqadaha dhexe iyo kuwa hoose – halka ururka Suufiyadu ay ku leeyihiin dabaqadahan dad fara badan oo raacsan.

### *Majmaca Culimada*

Sida ay qortay International Crisis Group, asalka *Majmaca Culimada* waxa ay dib ugu laabanaysaa koox yar oo ka kooban 30 sheekh oo sunni ah oo isu abaabulay in ay is difaacaan kadib burburkii dowladda Soomaaliya. Maleeshiyada is difaaca ka dhalatey ayaa lagu magacaabi jiray *Horseed*, iyadoo gole Islaami ah laga barbar sameeyay. Inkastoo *Horseed* islamarkiiba la kala diray, haddana iyada ayaa asal u noqotay *Majmaca Culimada*.[35] Burburkii taliskii militariga ee Siyaad Barre uu hogaaminaayey ayaa sahal ka dhigtay in la sameeyo urur diimeed, taasoo dabcan fursad dhiiragelin ah siisey xubnihii asaasaayey kooxda.[36] Rasmi ahaan, ururkan waxaa la aasaasey sanadkii 1991, waxaana aasaasey hoggaamiyihii ugu horreeyay ee ururka, Sheekh Maxamed Macallin Xasan, wax yar uun kadib markii la riday Siyaad Barre.

*Majmaca Culimada* waxaa uu ahaa mid awooddiisu hooseyso, sida uu sheegay mid kamid ah hoggaamiyeyaashiisa wakhtigan, hadda waxa uu leeyahay qaab-dhismeed xaddidan oo ay ku jiraan tiro yar oo culimaa'uddiin ah iyo aqoonyahanno ka socda ururo yaryar oo kala duwan. *Majmaca Culimada* waxa uu leeyahay hal waax – *Maktabul Istishaaratul Fiqi* – oo ku shaqeysa nidaamka maxkamadaha oo qabata arrimaha yar yar sida khilaafyada iyo dhaxalka, iyadoo lagu saleynayo mabaadii'da Islaamka iyo sidoo kale wax labaad

33. United Nations Monitoring Group on Somalia and Eritrea, 'Report of the Monitoring Group on Somalia and Eritrea pursuant to Security Council resolution 2182 (2014)', 13.
34. Wareysi lala yeeshay sheekh caan ah X6.
35. Eeg, tusaale ahaan, International Crisis Group, 'Somalia's Islamists', *Africa Report* 100 (2006): 16—17.
36. Wareysi lala yeeshay sheekh caan ah X6.

– *Maktabul Tacliim* – oo ka shaqeysa arrimaha waxbarashada iyo deeqaha waxbarshada (gudaha iyo dibadda).

Ururku waxaa uu dhex dhexaadin ka dhex sameeyey beelaha Haber Gedir iyo Biyamaal (horraantii 2012), iyo sidoo kale colaado u dhexeeyey beelaha Dir iyo Xawaadle. Waxaa uu xiriir dhaw la leeyahay *Aala Sheekh*, iyadoo ay jiraan xubno ka wada tirsan labada urur.

### *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* (Sufi)

Sida lagasoo xigtay Kooxda Xasaradaha Caalamka (International Crisis Group), koox ka tirsaneyd *Majmaca Culimada* uuna hoggaaminayay Sheekh Shariif Sheekh Muxiyadiin ayaa ka go'ay Majmaca iyagoo ka jawaabaya codsigii Maxamed Faarax Ceydiid ee ahaa in ay taageero diimeed siiyaan garabkiisa hubaysan ee United Somali Congress. Aragtidan, sikastaba ha ahaatee, waxaa diiddan xubnaha kale ee suufiyada oo ku andacoonaya in xubnaha kooxdaas yar ay xiriir daciif ah la lahaayeen *Majmaca Culimada*a.[37] Kooxda waxaa hogaaminayey Sheekh Shariif Sheekh Muxiyadiin waxayna ahaayeen kuwo qabiil ahaan u dhisan (Haber Gedir), waxaana markii hore ku biiray culumo ka kala socday labada dhinac oo kala ah *dariiqada Suufiyada* iyo mad-habka Shaaficiga guud ahaan.[38]

Billowgii hore, *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* waxa ay ku socotey qaab iska hooseeya oo aan aad u muuqan, waxayna lahayd saameyn siyaasadeed iyo mid militeri oo aad u xaddidan sanadihii sagaashamaadkii, taasoo ka dhigtey urur suufi dhab ah. Muddadaas, ururku wuxuu aasaasay, ama ka qeyb qaatey, maxkamadaha shareecada ee bartamaha Soomaaliya.[39] Qaab-dhismeed hoggaan dhexe ah ayaa lagu dhisay waxaana hoggaan looga dhigey Sheekh Shariif Sheekh Muxiyadiin, oo ka tirsan *dariiqada* Qaadiriyada (dariiqada ugu weyn Soomaaliya), halka guddoomiye ku xigeenka iyo xoghayaha labadaba laga keenay *dariiqada* Axmadiya (Saalixiya waxaa loo arkay qeyb-hoosaad kamid ah Axmadiya, sidaas ayaana loogu dhigay qeyb kamid ah qoondada Axmadiya). Arrimaha qabiilka ayaa sidoo kale saameyn ku yeeshey magacaabista.[40]

Horraantii 2000, *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* waxay si firfircoon isugu dayday inay ka hortagto saameynta Salafiga ee shirkii nabadeynta Soomaaliya oo ay Kenya martigelisay, taasoo keentay in ururku noqdo mid si xoog leh siyaasadda ugu milmey. Soo ifbaxa al-Shabaab ayaa sii xoojisay arrintan, iyadoo kooxo dhowr ah ay isku abaabuleen dalladda *Ahlu Sunna Wal Jamaaca*, lagasoo bilaabo sanadkii 2008, waxayna billaabeen dagaal ka dhan ah al-Shabaab. Dhammaan kooxahan ayaan u wada muuqan kuwo xiriir la sameeyey hoggaanka ururka, balse waxay ahaayeen kooxo madax-bannaan oo ka tirsan dallada *Ahlu Sunna Wal Jamaaca*.

Waxaa intaa dheer, qaar badan oo kamid ah xubnahan cusub – oo aaminsan fikirka/mad-habka Shaaficiga si ka badan fikirka suufiga – waxay u arkeen ururka mid ku dhisan waaqica dalka. Maleeshiyaadkan deegaanka ayaa guulo ka gaaray la dagaalanka al-Shabaab. Si ugu yaraan loo ilaaliyo midnimada dhalanteedka ah, hoggaanka *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* waxaa uu la xiriiray dhowr kamid ah kooxaha kale ee madaxa-bannaan oo magacooda ama dalladdooda isticmaalaya, waxaa ayna isku dayeen in ay sameeyaan hoggaan dhexe. Sikastaba ha ahaatee, kooxdu aad bay u kala qeybsantay. Qaar kamid ah maleeshiyaadka deegaanka ayaa iyagana sameeyay maamullo deegaanka ah: Kan ugu

37. Eeg, tusaale ahaan, International Crisis Group, ' Somalia's Islamists'; Interview with the son of a prominent Sufi sheikh X3, 21 January 2021.
38. Wareysi lala yeeshay sheekh Suufi caan ah X3, 21 January 2021.
39. Mark Bradbury and Sally Healy, 'Whose peace is it anyway? Connecting Somali and international peacemaking', *Accord, an international review of peace initiatives* 21 (2010).
40. Wareysi lala yeeshay wiilka sheikh suufi caan ah X3, 21 January 2021.

xooggan ayaa laga sameeyey Galmudug, waxaana madax u ahaa Sheekh Ibraahim Sheekh Xasan (Guureeye), iyo Sheekh Xasan Faarax. Maamulka *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ee Galmudug, sikastaba ha ahaatee, ma aysan sameynin maxkamado shareecada ku dhisan, balse waxay ku saleeyeen xeer-dhaqameedka beelaha, iyagoo sumcad wanaagsan ku helay ilaalinta amniga. Waxaa intaa dheer, ma aysan canshuurin dadweynaha deegaanka.[41]

Sannadkii 2011-kii, *Ahlu Sunna Wal Jamaac*a waxa ay saameyn toos ah ku yeelatey dowladda Soomaaliya, iyadoo kooxdu ay ku naalooneysey xiriir dhow oo ay la lahayd madaxweyne Shariif Sheekh Axmed (2009-2012) iyadoo ay suuragal tahay in ay ugu wacan tahay xiriirkaan xaqiiqda ah in madaxweyne Shariif uu kasoo jeedo qoys caan ah oo suufi ah. Shariif Axmed ayaa kulamo is-daba-joog ah la qaatay guddoomiyaha *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ee xilligaas Sheekh Shariif Sheekh Muxiyadiin, halka shan wasiir oo ka tirsan xukuumadiisa ay kamid ahaayeen Ahlu Sunna.[42] Sidoo kale muddadaas, dhowr sheekh oo suufi ah oo xiriir la leh ururka – sida afhayeenkii unugga xuddunta u ahaa kooxda, Sheekh Cabdulqaadir Soomow – ayaa caan ka dhex noqdey guud ahaan shacabka Soomaaliyeed.

Sidoo kale, qeyb-hoosaadka ururka ee Galmudug ayaa dhexda ka galey hardan awoodeed oo deegaanka ah iyagoo aan oggolaansho ka haysan madaxda dhexe. Sidoo kale, waxay u muuqataa in madaxda Galmudug ee deegaanka ay dayaceen ama ay ku gacan seereen hoggaanka dhexe ee ururka, iyadoo tusaale ahaan, kooxda hore aanay ku casuumin kuwa kale shirarka ay la galayeen dowladda Soomaaliya. Guddoomiyaha hoggaanka dhexe, Sheekh Shariif Sheekh Muxiyadiin ayaa, sikastaba ha ahaatee, ka gaabsaday, inuu meel fagaare ah ku dhaleeceeyo kooxda Galmudug. Sanadkii 2014-kii kooxda Galmudug ayaa si weyn qeyb uga noqotey loollanka awoodeed ee la xiriirey dhismihii maamul-goboleedka Galmudug, waxayna ku lug lahaayeen dagaalladii ay kula jireen kooxaha kale ee siyaasadeed ee maamulkaas. Saameyntii ugu sareysey marka loo eego saameynta deegaanka ayaa aheyd heshiiskii nabadeed ee Galmudug oo ay kala saxiixdeen hoggaanka maamulka Galmudug iyo *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* bishii December 2017, markaa oo kooxda lagusoo daray heshiis awood-qeybsi ah. Wakhtigaan, saameyntii *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ee Galmudug iyo heshiiskii nabadeed ayaa burburey, iyadoo kooxda ay ka adkaadeen ciidamo ka tirsan dowladda Soomaaliya iyo kuwa deegaanka oo isbaheysanaya.

Dhanka kale, Muqdisho, hoggaanka dhexe ee *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ayaa lumiyay awooddii ay ku lahaayeen dowladda kaddib is-beddelkii hoggaan ee dhacay sannadkii 2012. Marka la eego Madaxweyne Maxamed Cabdullaahi Maxamed 'Farmaajo' ee hadda talada haya, *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ayaa sii kordhineysa ololaha ay ugu jirto inay ku yareyso saameynta xubnaha *al-Ictisaam*. Gaar ahaan, doodaha fagaare ee u dhexeeya Sheekh Soomow ee *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* katirsan iyo Sheekh Umal oo ah *al-Ictisaam* ayaa caan ka noqday Soomaaliya.

Maanta, kooxdu waa mid aad u habacsan, oo wajaheysa xakameyn deegaanka ah oo ballaaran iyo kala daadsanaan iyadoo xitaa aan laheyn kala sarreyn cad. Iyadoo saas ay tahay, *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ayaa saldhig adag ku leh Muqdisho. Ururka ma laha daahfurnaan, laga yaabee in ujeedadu tahay in lagu qariyo kala qeybsanaantiisa gudaha. Waxaa weli inta badan gacanta ku haya xubno kasoo jeeda beesha Hawiye, inkastoo qaar kamid ah koox-hoosaadyada ku xiran kooxda ay u badan yihiin beelaha kale. Marka lagasoo tago xaaladda kala qeybsanaanta, haddana *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* waxa ay ku fidsan tahay

41. Wareysi lala yeeshay qof gudaha Soomaaliya jooga oo xog-ogaal ah X2, 21 January 2021.

42. Associated Press, 'Militants join Somali government', 16 March 2010. Acessed 16 March 2021, http://archive.boston.com/news/world/africa/articles/2010/03/16/militants_join_somali_government/.

miyiga marka loo eego ururrada kale ee diinta, waana dhaqdhaqaaqa keliya ee dadka aan dabaqada sare aheyn qeybta ka yihiin sida lagu sharraxay warbixintan.

# 4. IS-DHEXGALKA QABIILKA, DIINTA IYO MACAASH-DOONKA

Culimada iyo ururrada diinta ee Soomaaliya waxaa ay ka dhex jiraan xaalad daacadnimada iyo aqoonsigu ay isku dhex milan yihiin. Aqoonsiga qabiilku wuxuu mar walba saameyn ku lahaa siyaasadda Soomaaliya, sidoo kale wuxuu leeyahay dano dhaqaale iyo mid maamul. Hadallada sheekh caan ah oo salafi ah waxaa kamid ahaa:

> Ururrada diinta waxaa maamula dad iyaga laftooda ku abtirsada beelo. Taas macneheedu waxa weeye in urur diimeedyadu ay xiriir toos ah iyo mid aan toos ahaynba la leeyihiin beelaha. Islaamka dhexdiisa, abtirsiimada iyo aqoonsiga inta badan aad baa loo qiimeeyaa. Waxay ilaalisaa oo kor u qaaddaa isticmaalka togan ee qabiilka. Dabcan, mararka qaarkood waxaa jira in aan loo baahnayn isticmaalka qabiilka oo ay qabaan qaar kamid ah ururada diinta, hase yeeshee taasi maaha wax lagu sheegay diinta Islaamka.[43]

Sida ay tani muujinayso, koox-diimeedyada iyo aqoonsiga qabiilka ayaa inta badan isku milmey Soomaaliya. *Al-Islaax* ayaa lagu eedeeyaa in ay si weyn xubnaheeda uga qaadato hal beel oo ah Shiikhaal, halka *Majmaca Culimada* lagu eedeeyo in xubnaheeda ugu badan ay yihiin Hawiye.[44] *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* oo ah ururka ugu weyn ee fikirka suufiyadu taabacsan, waa mid ilaa xad ay ku awood badan yihiin Habar Gedir. Waxaa intaa dheer, qaab-dhismeedka hoose ee ururrada inta badan waxaa lagu saleeyaa hab-beeleed, sida dhacday xilligii *al-Itixaad al-Islamiyah ee* sagaashamaadkii.[45] Arrin kale oo middaan la xiriirta ayaa ah xeer-ka oo ah nidaamka sharci ee soo jireen ah kuna xooggan miyiga Soomaaliya. Xeerku wuu ka duwan yahay oo, ilaa xad, wuxuu caqabad ku yahay shareecada. Meelaha ay ku kala duwan yihiin waxaa kamid ah arrinta dhaxalka dumarka, shareecada oo diiradda saarta qoyska dhow, iyo saameynta dheelitirka awoodda qabiilada ay ku leedahay heshiisyada beelaha dhexdooda ah.[46] Haddana, sida uu Mohamed Hussen Gaas ku muujiyey maqaalkii ugu wanagsanaa ee laga qoray sida isbedbedelka iyo xasiloonida ay isugula jiraan nidaamka qabiilka Soomaaliyeed. Waxaa muhiim ah in la

43. Wareysi lala yeeshay sheikh Salafi ah X1.
44. Eeg, tusaale ahaan, Hansen and Mesøy 'The Muslim Brotherhood in the wider horn', 41.
45. Eeg, tusaale ahaan, International Crisis Group, 'Somalia's Islamists', 6—7, gaar ahaan kadib markii uu dhamaaday waqtigii Laas-qoray ee kooxda 1992. Waxaa xusid mudan in mararka qaar – sidii dagaalkii Carraale ee 1991-kii, uu Xasan Daahir Aweys (Hogaamiyihii dambe ee *al-Itixaad al-Islaamiyah*) ka goostay. kooxda *al-Itixaad al-Islaamiyah* waxay ku guulaysteen inay ka gudbaan qabiilka. Sidoo kale eeg Roland Marchal and Zakaria M. Sheikh, 'Somalia's Salafists', *Islamic Africa* 6/1—2 (2015): 149.
46. Eeg, tusaale ahaan, Lidwien Kapteijns, 'Gender Relations and the Transformation of the Northern Somali', *The International Journal of African Historical Studies* 28/2 (1995): 255; Andre Le Sage, 'Stateless Justice in Somalia: Formal and Informal Rule of Law Initiatives', Center for Human Dialogue Report, 2005. Tusaale ahaan shareecadu waxay qabtaa in dhaxalka dumarka uu yahay boqolkiiba 50, halka dhulka miyiga ah ee koonfurta Soomaaliya marka uu ninku dhinto xaaskiisa iyo gabdhihiisa aysan wax xuquuq ah ku lahayn dhulkiisa oo ay dhaxlaan wiilashiisa. Sidoo kale Eeg United Nations Food and Agricultural Organization (FAO), 'Customary norms, religious beliefs and social practices that influence gender-differentiated land rights', UN Gender and Land Rights Database (GLRD), 2010. Accessed 11 January 2021, www.fao.org/gender-landrights-database/country-profiles/countries-list/customary-law/en/?country_iso3=SOM.

fahmo fikradda qabiilka: 'Qabiilku waxaa si fiican loogu fahmi karaa in uu yahay mid isku keenaya qeybo kamid ah wax u muuqda asal laakiin isbedbedela.'[47]

Aqoonsiga qabiilku wuu isbeddeli karaa, waxaa la adeegsan karaa, wuxuuna yeelan karaa macnayaal kala duwan marka ay jiraan xaalado kala duwan. Sidaas daraadeed, waxaa ku jira heer xasilooni ah oo ay muhiim tahay in la fahmo marka ay timaado fahmidda siyaasadda Soomaaliya, taasoo ay tahay in la tixgeliyo marka la baaraayo nolosha diinta Soomaalida. Jamhuuriyaddii Soomaaliya kahor 1969-kii, qabiilku waxa uu ahaa aalad lagu abaabulo axsaabta siyaasadda, halka habka ay Soomaalidu hadda wax ku doorato ee 4.5, qabiil kasta oo weyn loo qoondeeyay qoondo (halka ''.5' loo asteeyey beelaha/kooxaha yaryar). Ma jiro khilaaf u dhexeeya qabiilka iyo diinta. Si lamid ah, tusaale ahaan, sida muwaadinka Mareykanka ah loogu aqoonsan karo Masiixi iyo Mareykan, ayaa qofka Soomaaliga ahna wuxuu isku lahaan karaa aqoonsiga Islaamka iyo haybta qabiilka uu kasoo jeedo. Iyadoo loo eegaayo duruufaha, labada aqoonsi midkood ayaa laga yaabaa inuu mararka qaar ka muhiimsan yahay kan kale. Waxaa intaa dheer, labada aqoonsi ayaa laga yaabaa inay isla falgalaan oo xitaa dib u qeexaan midba midka kale.

Aqoonsiga qabiilku wuxuu kale oo uu go'aamiyaa shabakadaha oo inta badan, nabadgelyo-xumada guud awgeed, loo isticmaalo abaabulka bulshada iyo bixinta adeegyada amniga. Ururka *al-Islaax* waxa uu qiray muhimadda uu leeyahay qabiilku markii uu qaatay siyaasadii 'la macaamilka xaqiiqada' sanadkii 1995, taasoo u oggolaatay xubnaheeda in ay ka qeyb galaan golayaasha deegaanka ee lagu saleeyey beelaha.[48] Taas macnaheedu ma aha in diintu aysan muhiimad laheyn. Isdhexgalka diinta iyo qabiilku waa wax isbebedalaya, iyadoo shabakadaha diimeed ay mararka qaarkood ka xoog bataan qabiilka, taasoo ah xaalad laga yaabo in lagu muujinayo xasilloonida kooxaha diimeed marka loo eego kooxaha ku salaysan qabiilka. Waxaa intaa dheer, dhaqdhaqaaqyada diimeed, marka lagasoo tago in ay caqabado la kulmaan, haddana waxaa ay guulo ka gaareen ka saremaridda qabiilka marka loo eego dhaqdhaqaaqyada kale ee bulsho ee ka jira Soomaaliya.

Waagii hore, Soomaaliya diintu waxaa ay sidoo kale ku xirnaan jirtay ganacsi iyo macaash doon. Darajooyinka/magacyada diimeed waxaa ay qiimo weyn ku lahaayeen ganacsiga, iyagoo abuuraayey kalsoonida ay macaamiisha ku qabaan ganacsatada iyagoo usoo bandhigayay sawir lagu aamini karo. Tusaalooyinka waxaa kamid ah milkiilaha Hormuud (oo ah mid kamid ah shirkadaha isgaarsiinta ugu waaweyn Soomaaliya), Axmed Nuur Jimcaale; ganacsade Abuukar Cumar Cadaani; iyo Afhayeenkii hore ee Dalsan International (Shirkad maaliyadeed oo burburtay 2006) Maxamed Sheekh Cismaan.[49] Intaa waxaa dheer, ganacsatadu waxaa ay aqoonsigooda diimeed u isticmaali karaan si ay ugu biiraan shabakado diimeed ujeedooyin ganacsi awgood. Sidoo kale, hoggaamiyeyaasha diinta ayaa fure u ahaa abaabulka habab amni oo looga dan leeyahay in lagu ilaaliyo muwaadiniinta caadiga ah iyo ganacsatada (tusaale, maxkamadihii shareecada ee laga hirgeliyey Muqdisho kahor 2007).[50] Sikastaba ha ahaatee, waa inaan ka taxaddarnaa, si aan uga fogaanno aragtida ah in kooxaha diintu ay yihiin uun weelal ay adeegsadaan dad macaash doon ah oo dano gaar ah leh sida arrimaha fikirka, taasna waxaa daliil u ah doodda muddada dheer soo socotey ee u dhexeysay Suufiyada iyo Salafiyiinta. Intaa waxaa dheer, iyadoo laga yaabo in shakhsiyaad gaar ah ay ku dhiiragelisey dano shakh-

47. Mohamed Hussein Gaas, 'Primordialism vs. instrumentalism in Somali society: is an alternative needed?', *Journal of Contemporary African Studies* 36/4 (2018).

48. 'How to deal with the new realities' waxaa markii hore looga dooday Toronto, Canada, kadib dhicitaankii taliskii bishii Janaayo 1991, iyadoo siyaasadda 'la macaamilka xaqiiqada' si rasmi ah loo ansixiyay 1995. Hansen, Gaas and Bary 'The Muslim Brotherhood in the Arab winter', 13; Hansen and Mesøy, 'The Muslim Brotherhood in the wider horn', 49.

49. Stig Jarle Hansen, 'Civil War economies, the hunt for profit and the incentives for peace', AE Working paper 1, 2007, 71.

50. Hansen, 'Civil War economies'.

siyadeed si ay ugu biiraan ururka Salafi oo intaba badan xubno ay ka yihiin dadka ladan ee elite-ka loo yaqaanno, haddana Ikhwaan ama xitaa shabakadaha suufiga ah, tani ma sharrixi karto siyaasadaha iyo dadaallada samafalka ee ballaaran ee ururada lagu fal-anqeeyay warbixintan.

# 5. DOORKA KOOXAHA DIIMEED EE DHAQDHAQAAQYADA SIYAASADEED

Ururrada diinta ayaa kaalimo kala duwan ku leh siyaasadda Soomaaliya. Dhinac marka laga eego, kooxaha diimeed waxay si firfircoon uga qeyb qaataan dagaallada hubeysan ama waxay isku hawlaan inay saameyn ku yeeshan dowladda. Dhinaca kale, waxa jirta saameyn ballaaran oo ay bulshada ku leeyihiin hoggaamiyeyaasha diinta kuwaasoo, inkastoo aanay si cad u ahayn kuwo siyaasadeed, haddana ay macquul tahay in ay yeeshaan saameyn siyaasadeed. Iyadoo kooxo badan oo sheegtay inay yihiin saamileey door ku leh dhaqdhaaqa diimeed ee Soomaaliya sida *al-Itixaad al-Islaamiyah* iyo *al-Shabaab* ay horay usoo dagaallameen, kooxahan hubeysan diiradda maku saareyno warbixintan. Waxayse tusaale u noqon kartaa sida ay diintu udub-dhexaad ugu noqon karto abaabulka, in siyaasadda laga sooco diintana suuragal ma aha. Soomaaliya, diintu waxay ahaan doontaa qeyb kamid ah hannaanka siyaasadda ee mustaqbalka.

Saameynta ay diintu ku leedahay siyaasadda Soomaaliya ayaa leh dhinacyo badan, waxaana laga yaabaa inay ku lug yeelato ka qeybgalka aan tooska ahayn ee culimada kaasoo, marka laga eego aragtidooda, keliya ka faallooda dhaqamada maalinlaha ah iyo akhlaaqda. Mowduucyada lagaga hadlo khudbadaha jimcaha – tusaale ahaan falanqeynta anshaxa guud ama dhaleecaynta dhaqamada musuqmaasuqa ee ka dhex jira ganacsiga – waxa laga yaabaa inay yeeshaan saameyn aad uga ballaaran bulshada. Saameynta noocaan ah waxaa sii xoojiya marka culimo badan oo magac-weyn leh – tusaale, Sheekh Umal iyo Sheekh Soomow –khudbadahooda aad loogu baahiyo baraha internet-ka ah iyadoo loosii marinayo aaladaha internet-ka ee aad loo isticmaalo sida YouTube-ka. Faafinta khudbadahaas waxay saameyneysaa ra'yiga dadweynaha ee arrimaha siyaasadda iyagoo aan si toos ah qeyb uga ahayn nidaamka siyaasadeed. Habkan aan tooska ahayn ee saameynta leh ee lagula falgalaayo siyaasadda ayaa ah mid ay adag tahay in la cabbiro amaba inta badan in la iska indho tiro, maadaama aysan noqon war aad loo hadal hayo. Intaa waxaa dheer, qaar badan oo kamid ah hoggaamiyeyaasha diinta waxay isku haystaan inay yihiin ilaaliyeyaal anshaxa bulshada oo aysan ahayn siyaasiyiin.

Hogaamiyeyaasha diinta iyo ururradu waxay sidoo kale saameyn ku yeeshaan siyaasadda iyagoo noqda adeeg bixiyayaal sida dhinacyada horumarinta iyo bini'aadamnimada, iyagoo bixiya adeeg dalal badan loo tixgeliyo inuu yahay mid ay dowladda bixiso. Bixinta adeeggu waxay saameyn ku yeelan kartaa wax-ka-beddelka mudnaanta siyaasadeed ee adeeg bixinta dowladda Soomaaliya iyo dowlad-goboleedyada, iyo sidoo kale howl-wadeennada arrimaha bini'aadamnimada. Waxay kaloo xoojisaa daacadnimada loo hayo culimada. Waxaa sidoo kale muuqda saameyn gaar ah oo ay shaqsiyaad leeyihiin; taasoo horseedda in hoggaamiyeyaasha diinta ay xilal ka helaan dowladda Soomaaliya ama ay xiriir shaqsi ah la yeeshaan siyaasiyiinta. Salafiyiinta Soomaaliya iyo Ikhwaan-ka ayaa ah kuwo saameyn leh, taasoo la micno ah inay caadi tahay in ay qabtaan xilal dowladeed. Tani, sikastaba ha ahaatee, waxay noqon kartaa dhibaato, sababtoo ah waxaa laga yaabaa ama suuragal ah in jilayaal kale – sida suufiyada – la dhigo awood la'aan siyaasadeed. Xiriirka siyaasiga ah ee shaqsiyaadka ku salaysan, sida *Ahlu Sunna*

*Wal Jamaaca* ay ku naaloonayeen xilligii uu madaxweynaha ahaa Shariif Sheekh Axmed (2009-2012), ayaa si lama filaan ah saameyn ugu yeelatay galaangalka siyasadeed ee *Ahlu Sunna*. Saameynta shaqsi ama kooxeed way adag tahay in si dhab ah loo sahmiyo waxaana laga yaabaa in si sahal ah loo qiyaaso, ama loo muujiyo xiriir khiyaali ah oo ay abuureen aragtiyaha aan runta ku saleysneyn. Sidoo kale, way adag tahay in la qiimeeyo nooca saameynta ee markaas dhacaya – taasoo ah, haddii uu qofku isku dayayo inuu sare u qaado mawqifkiisa ama kan ajendayaasha diimeed. Arrintan, dadkii siyaasiyiinta ahaa ee lagu wareystay warbixintan ayaa ku kala aragti duwanaa, iyadoo qaar kamid ah wasiirada culimada ah u arkaayay dad fursad raadis ah.

Saameynta waxa kale oo lagu heli karaa xisbiyada siyaasadeed ee diinta ku saleysan. Soomaaliya, inkastoo shakhsiyaad u dhaqdhaqaaqa diintu ay marmar isku dayeen in ay furaan xisbiyo siyaasadeed oo iyaga u gaar ah, haddana tiro aad u yar oo ururro Islaami ah ayaa tijabadaas isku dayay. Dhanka kale, ururradan ayaa mararka qaarkood si firfircoon ugu dadaala sidii loo beddeli lahaa nidaamka markaas jira, sida laga dheehan karo iskudayadii *al-Itixaad al-Islamiyah* iyo *al-Islax* sannadihii 1980-aadkii. Tani waxay dhinacyo badan ka shabahdaa ururrada bulshada rayidka ee isbeddel doonka ah sida lagu arko dalalka kale.

Si kooban haddii loo dhoho, lix nooc oo saameyn diimeed ku leh siyaasadda Soomaaliya ayaa la arki karaa, iyadoo loo kala saari karo sidan: 1) jabhado hubeysan; 2) ururrada diinta ee u halgamaya isbeddelka nidaamka; 3) xisbiyo siyaasadeed oo diin ku saleysan; 4) hal-qof/shabakado saameyn leh; 5) saameynta lagu sameeyo adeeg bixinta iyo 6) saameyn siyaasadeed oo dadban. Qabaabkan kala duwan ayaa si qoto dheer hoos loogu falaqeynayaa.

## Jabhado hubeysan

Tusaalooyinka ugu dambeeyay ee jabhadaha hubeysan waxaa kamid ah doorka *Ahlu Sunna Waljamaaca* ee Galmudug, inkastoo ay xusid mudan tahay in inta badan dadka aaminsan yihiin maanta una arkaan ku lug lahaanshaha ururka ee siyaasadda mid aan wanaagsaneyn. Waxaa intaa dheer, in *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ay xoogaa kala qeybsantay waxay ka dhigan tahay in hoggaanka dhexe uu dareemayo in ay xaddidan yihiin saameynta iyo gacan ku haynta koox-hoosaadyadii jiray ee qeyb ka ahaa abaabulka ciidan ee ka dhanka ahaa al-Shabaab. Dhowr qof oo darasadan lagu wareystay ayaa iftiimiyay in hub qaadashadii *al-Itixaad al-Islamiyah* uu sababay aasaaska *al-Ictisaam*, iyadoo kooxdan dambe ay rabeen inay iska fogeeyaan kuwii hore (inkastoo xubno ay mar dambe doorteen inay mar kale taageeraan dagaal iyo hub qaadasho).

Sidoo kale, ururka *al-Islaax* waxaa soo wajahay qalalaase gudaha ah oo la xiriira adeegsiga gacan ka hadal, iyadoo kooxda la baxday *Dam Jadiid* oo la aasaasay sanadkii 2006-dii ay xubno ka ahaayeen xubno doonaya inay taageeraan halgan hubeysan oo iska caabin ku dhisan (inkastoo aysan jirin wax caddeynaya in kooxdu ay si firfircoon uga qeyb qaadatay dagaalladii Soomaaliya ka dhacay kadib sanadkii 2009).

## Ururrada diinta ee u halgamaya isbeddelka nidaam

Saameynta *al-Ictisaam, al-Islaax, Dam Jadiid* iyo *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ayaa isbedbeddeleysay muddooyinkii dambe, marka ay timaado in ay saameyn ku yeeshaan siyaasiyiinta heer qaran, iyo sidoo kale dowlad goboleedyada. Gaar ahaan tobankii sano ee lasoo dhaafay, uma muuqato in kooxo diimeedyada Soomaaliyeed ay sameeyeen isku dayo firfircoon oo ay ku doonayaan in ay wax kaga bedelaan xukuumadda ama madaxweynaha, haddii ay ahaan lahayd heer qaran ama heer dowlad goboleed (marka laga reebo Galmudug). Mucaarad lasoo abaabulay sida kii *al-Itixaad al-Islamiyah* iyo *al-Islaax* ee kasoo horjeeday

taliskii Barre dabayaaqadii 1970-meeyadii ilaa horraantii sagaashamaadkii hadda waxaad mooddaa inay tahay wax lagasoo gudbay. Iyadoo ururrada diineedku ay abaabuli karaan olole hal arrin la xiriira, haddana sida caadiga ah si cad uma dhiirrigeliyaan isbeddelka nidaamka. Mid kamid ah culimada lagu wareystay warbixintan waxa uu sheegay:

> Kooxaha diinta ee wakhtigan la joogo waxay xiriir dhow oo wanaagsan la leeyihiin heerarka kala duwan ee dowladda – dowladda federaalka iyo dowlad goboleedyada. Waxa kale oo ay baarlamaanka kala shaqeeyaan howl maalmeedkooda sharci si ay u waafajiyaan shuruucda iyo hindise sharciyeedyada caqiidada Islaamka. Waxa kale oo ay xiriir dhow oo wanaagsan la leeyihiin warbaahinta, kuwaasoo inta badan faafiya warar ku saabsan dhaqdhaqaaqyada ururrada diinta.[51]

## Xisbiyada siyaasadeed ee urur diimeedyada

Xisbiyada siyaasadeed ee urur diimeedyada ayaa sidoo kale ah kuwo naadir ku ah Soomaaliya. Inkastoo dhowr xisbi siyaasadeed ay aasaaseen culimaa'udiinka – tusaale ahaan, *Xisbiga Midnimo Qaran* ee uu Cabdiraxmaan Cabdullaahi Baadiyoow aasaasay – madaxdoodu waxay u janjeeraan in ay ku adkaystaan in xisbiyadu ka madaxbannaan yihiin ururradooda diimeed. Intaa waxa dheer, iyadoo xisbiyada siyaasadda sida *Himilo-Qaran* laga yaabo inay xubno ka yihiin xubno katirsan urur diimeedyo, xisbiyada laftooda ma ahayn kuwo ay curiyeen shakhsiyaad muhiim ah oo urur diimeedyo katirsan. Waxaa kale oo xusid mudan in xisbiyada siyaasadda Soomaaliya guud ahaan ay yihiin kuwo aan xasilloonayn, oo aan ahayn kuwo hay'addo ahaan u shaqeeya waxana ay ku tiirsan yihiin hal qof. Natiijo ahaan, waxay u muuqdaan inay si dhakhso ah u baaba'aan. Waxaa intaa dheer, xubnaha Ikhwaanka waxay in badan ka doodeen ilaa heerka laga qeyb qaadan karo nidaamka siyaasadeed, taasoo saameyn ku yeelanaysa fikirka ururrada leh asal Ikhwaan, sida *Al-Islaax, Dam Jadiid* iyo *Aala Sheekh*.

Qaar kamid ah xubnaha Ikhwaanka Suudaan iyo Masar ayaa walaac ka muujiyay in xisbiyada siyaasadeed ee ku xiran Ikhwaanka ay kala qeybiyaan dadka Islaamka ah oo ay abuuraan khilaaf. Inkastoo aragtida ah abuurista xisbi siyaasadeed guud ahaan in loo daayo sidii suurtogalnimada tahay ugu dambeyntii laga adkaaday, xaaladaha qaarkood (sida *Ennahda* ee Tunis) xisbiga ayaa laga soocay dhaqdhaqaaqyada diimeed. Xaaladaha kale, Ikhwaan qaar kamid ah ayaa ku adkaystay inaysan jirin wax xiriir ah oo ay la leeyihiin xisbi siyaasadeed, inkastoo ay caddahay in xisbiyadu uu dhab ahaantii yihiin cudud Ikhwaan (sida Xisbiga Xoriyadda iyo Caddaaladda ee Masar). Waxaa intaa dheer, xisbiyada ku saleysan diinta waxaa xaddidaya dastuurka Soomaaliya. Ugu dambeyntii, marka la eego aragtiyaha dadkii daraasadan lagu waraystay, kaliya suufiyada, *Ahlu Sunna Wal Jamaaca*, ayaa ku doodeen in xisbiyo siyaasadeed ku salaysnaadaan dhaqdhaqaaq diimeed.

Sida aan kor kusoo xusnay, urur diimeedyada iyo culimada Soomaaliyeed kamasoo horjeedaan dimoqraadiyadda. Inta badan dadka aan wareysannay ayaa muujiyay taageerada doorashada xorta ah marka ay timaado doorashada hogaanka dalka. Sikastaba

51. Wareysi lala yeeshay Sheekh Salafi ah X2.

ha ahaatee, qaar kamid ah xuquuqaha madaniga ee dimuqraadiyadda Galbeedka ayaa qeyb ahaan dood laga keenay:

> Dimuqraadiyaddu waxay leedahay labo nooc; mid waa mid ku dhisan fikrad halka midka kalena uu ku salaysan yahay xaqa ay dadku u leeyihiin inay doortaan hoggaankooda. Islaamku ma dhibsado tan labaad kor ayuuna u qaadaa. Midda hore oo ah mabda'a, waxa ay dadka siisaa waxa ay raalli ka yihiin oo ka hor imanaya mabaadi'da Islaamka. Muslimiintu waxay ku xiran yihiin waxa ay shareecada oggoshahay ama diiddan tahay.

Sidaas darteed, dimuqraadiyaddu guud ahaan – sida ku cad dastuurka Soomaaliya – waa mid ku salaysan shareecada. Si kale haddii loo dhigo, shareecada Islaamka waa in ay saldhig u tahay dimuqraaddiyadda.

### Saameynta shaqsiga/ama shabakadaha isku xiran

Urur diimeedyada Soomaaliyeed, hal qof ama shabakad isku xiran oo saameyn leh ayaa loo arki karaa inay ka muhiimsan yihiin xisbiyada siyaasadda. Taasina waa dhab marka la eego muhiimadda joogtada ah ee qabiilku ku leeyahay siyaasadda Soomaaliya, iyadoo xisbiyada diineedku aad u jecel yihiin in ay ka fogaadaan daacadnimada qabiilka – gaar ahaan si fagaare ah – si loogu ixtiraamo in ay yihiin urur diin. Urur-diimeedyo dhowr ah oo hore loo sheegay ayaa xubno kamid ah xilal siyaasadeed oo muhiim ah qabteen, iyo/ama xubno kamid ah lagu casuumay in ay ra'yigooda ama taladooda siiyaan xukumadda Soomaaliya. Si gaar ah waxaad mooddaa in *Alhu Sunna Wal Jamaaca* iyo *Aala Sheekh* ay ku naaloonayeen xilal siyaasadeed oo gaar ah xilligii Shariif Sheekh Axmed uu madaxweynaha ahaa (2009-2012), halka xubnaha *Dam Jadiid*na ay faa'iidooyin lamid ah heleen xilligii Xasan Sheekh Maxamuud (2012-2016).

Inkastoo xubnaha *Dam Jadiid* lagu eedeeyay inay xilal ka hayeen dowladda, ma cadda saameynta ay arrintan siisay ururka. Tani waxaa sabab u ah, marka hore, xiriirka saxda ah ee ka dhexeeya shakhsi golaha wasiirada ka tirsan iyo urur diimeed waa adag tahay in la ogaado; Marka labaad, dad badan ayaa ku adkaysanaya in la kala saari karo doorka xubinnimada urur diimeed iyo ka mid ahaanshaha golaha wasiirrada. Marka la eego in xubno badan oo ka tirsan *al-Islaax, Dam Jadiid* iyo *al-Ictisaam* ay yihiin kuwo heer aqoon sare leh, waxaa dabiici ah in qaarkood ay ku danbeyn doonaan xilal sare oo siyaasadeed. Sikastaba ha ahaatee, xiriirka u dhexeeya jagooyinka awoodda iyo ururrada diimeed, oo ay weheliyaan qaab-dhismeedka ururrada oo aan muuqan oo badanaa qarsoodi ah, ayaa dhaliya aragtiyo aan runta ku saleysnayn. Arrin ka duwan shabakadaha aan rasmiga ahayn iyo isku labnaanta xilalka ayaa noqon kara in la abuuro hay'ado wadatashi oo rasmi ah, kuwaasoo aan hadda ka jirin Soomaaliya. Sikastaba ha ahaatee, waxa suurtogal ah in isku labnaanta noocan ahi uu sii jiro, taasoo qeyb ahaan ay ugu wacan tahay aqoonta sare ee xubnaha ururrada Islaamiga ah.

### Saameynta lagu sameeyo adeeg bixinta

Bixinta adeeggu waxay fududeyn kartaa xiriir aan rasmi ahayn oo lala yeesho dowladda. Sheekh Maxamed Cabdi Umal, tusaale ahaan, waxa uu soo qabanqaabiyay kulamo dhaqaale uruurin ah iyo dadaallo gargaar oo ka dhashay abaaro dhowr ah oo dhacay lagasoo billaabo sanadkii 2017-kii, taasoo keentay in uu kaalin weyn ka qaato gurmadka ugu danbeyntiina u sahashay inuu galaangal ku yeesho dowladda Soomaaliya. Bixinta adeegga ee xubnaha urur diimeedyada waxay ka dhigan tahay in beesha caalamku ay ku qasban tahay inay ayaga kala shaqeyso arrimaha isku xirka iyo isku-dubaridka. Arrimaha gargaarka ee culimada Salafiga oo mar mar ah, oo ay wehliso howl-wadeennada gargaarka bini'aadamnimo ee xiriirka la leh *al-Islaax* ee inta badan u shaqeeya qaab shak-

abad qarsoodi ah, waxay ka dhigan tahay in saameynta noocaas ahi ay adag tahay in la fahmo. Intaas marka laga yimaado, cilmibaaristu waxay tibaaxaysaa in ilaa iyo hadda ay u muuqato in dadaallada bini'aadamnimo ee *al-Islaax* ay yihiin, guud ahaan, kuwo dadku u siman yihiin. Waxaa intaa dheer, in *al-Islaax* uu sii waday inuu diiradda saaro wada-hadallada nabadeed ee heer deegaan waa in la xuso, iyo haddii ay suurtagal tahay, khibradda uu u leeyihiin dib-u-heshiisiinta (oo ay weheliso tan *Ahlu Sunna Wal Jamaaca*) waxa ay mudan tahay in laga faa’iidaysto.

Marka la eego daciifnimada hay'adaha dowliga ah ee Soomaaliya, waxay u badan tahay in ururrada diinta iyo shakhsiyaadka – maadaama ay kalsooni weyn ka dhex heleen shacabka – ay sii ahaan doonaan isha ugu weyn ee gargaarka mustaqbalka dhow. Waxa kale oo y u badan tahay in dadaalladan oo kale ay siin doonaan ururrada diinta aqbalaad weyn, iyadoo kor u qaadeysa xeelad kasta oo kale oo ay adeegsanayaan si ay saameyn ugu yeeshaan siyaasadda. Intaa waxaa dheer, bixinta adeeggu waxay madal muhiim ah u noqotaa hoggaamiyeyaasha diinta ee madaxa-bannaan si ay uga qeyb galaan dadaallada bulshada, iyadoo sare u qaadda saameyntooda ka baxsan farriimaha lagu gudbiyo warbaahinta iyo khudbadaha Jimcaha iyagoo muujiya inay ku dhaqmayaan waxay aaminsan yihiin iyo abuursa aqbalaad shacbiyadeed.

## Saamayn siyaasadeed oo dadban

Culimada madaxa-bannaan iyo ururrada waaweyn ee Islaamkuba waxay saameyn siyaasadeed oo dadban ku yeelan karaan khudbadaha iyo war saxafadeedya ay soo saaraan, ha noqoto khudbadaha Jimcaha ee gudaha iyo dibadda Soomaaliya ama ha noqoto warbaahin baraha bulshada sida YouTube. Hoggaamiyeyasha diinta ee qurbaha, tusaale ahaan, waxay isku dayaan inay saameyn ku yeeshaan hab-dhaqanka maxalliga ah khudbadahooda Jimcaha, halka sannadihii 1980-aadkii, khudbadihii jimcaha ee Muqdisho ay ahayeen madal *al-Islaax* iyo *al-Itixaad al-Islaamiyah* ay kusoo banddhigaan fikradahooda kasoo horjeeday dowladii kacaanka. Dowladda Soomaaliya waxa ay sidoo kale si firfircoon ula shaqeysay culimada in ay ka hadlaan sidoo kalena faafiyaan xogta ku saabsan cudurka Covid-19 ee 2020.[52] Intaa waxaa dheer, waxaa jira tusaalooyin badan oo ururo diimeed ay taageerayaan ama cambaareynayaan dhaqamo gaar ah sida digniinta haweenka ee ciyaaraha kubadda kolayga 2016, ama ka falanqeynta siyaasadda adduunka, sida markii Mareykanka uu aqbalay Qudus inay noqoto caasimadda cusub ee Israa'iil sanadkii 2017.[53]

## Dhaqdhaqyada urur diimeedyada iyo siyaasadda Soomaaliya ee maanta

50-kii sano ee lasoo dhaafay, urur diimeedyadu waxay noqdeen kuwo aad muhiim ugu ah qaabeynta siyaasadda Soomaaliya, si toos ah iyo si dadbanba. Maadaama ay mucaarad ahaayeen sannadihii Siyaad Barre, qaar badan ayaa ku guulaystey in ay helaan dhegaha siyaasiyiinta, mararka qaarkoodna, xubnaha ayaa laftooda siyaasiyiin noqday. Maanta, ma dhici karto in la kala saaro diinta iyo siyaasadda Soomaaliya, taasoo la macno ah in dhaqdhaqaaqyada diimeed ay yihiin qeyb kamid ah hannaanka siyaasadda. Waxa kale oo xusid mudan in, inkastoo ay jirto kooxeysi iyo kala qeybsanaantu, ay haddana jiraan ururo xaqiijiyay dhabar adayg sida ururrada *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* iyo *Majmaca Culimada* oo jiray ilaa bilowgii dagaalka sokeeye, halka *al-Islaax* iyo *al-Ictisaam* ay xitaa dagaalkii sokeeye kahor sii jireen. *Dam Jadiid* ayaa laga yaabaa inay tahay kooxda ugu da’da yar oo ilaa 14 sano soo jirtay. Haddaba, ururradan diiniga ahi waxay muujiyeen inay ka xasilloon yihiin dhaqdhaqaaqyada kale ee siyaasadeed, aadna uga xasilloon yihiin axsaabta

52. BBC News. ‘Coronavirus: Fighting al-Shabab propaganda in Somalia’, 2 April 202., Accessed 17 March 2021, www.bbc.com/news/world-africa-52103799.

53. Mohamed Olad, ‘Somali Clerics Warn Women Against Playing Basketball’, VOA, 22 December 2016. Accessed 20 March 2021, www.voanews.com/africa/somali-clerics-warn-women-against-playing-basketball.

siyaasadda, kuwaasoo ku dhisan shakhsi magac sare leh aadna ugu nugul yihiin burbur. Taas waxaa tusaale u ah in, *al-Islaax* marka laga reebo, aysan jirin xisbiyo siyaasadeed ama ururo jabhadeed oo ka jiray Soomaaliya kahor dagaalladii. Doorka kooxahan ee nolosha siyaasadda Soomaaliya waa isha ugu muhiimsan ee xasilloonida hay'adaha iyo ururrada.

Inkastoo ay aad u sahlan tahay in diiradda la saaro xagjirnimada diiniga ah – gaar ahaan falalka al-Shabaab – waxay u muuqataa in guud ahaan ururrada diinta ee Soomaaliya ay inta badan ka koreen rabshado: *al-Islaax, Dam Jadiid* iyo *al-Ictisaam* hadda kuma jiraan wax dagaal ah halka *Ahlu Sunna Wal Jamaaca* ay guud ahaan ku yar tahay dhaqdhaqaaqyada ciidan, marka laga reebo Galmudug. Dhab ahaantii, waxa laga yaabaa in la yareystay doorka nabad-sameynta ee ururrada diinta. Dedaalladii nabadeed iyo dib-u-heshiisiineed ee *al-Islaax* sameysay horaantii sagaashamaadkii iyo ka qeyb galka firfircoon ee uu ku lahaa geeddi-socodkii nabadda ee Carta ayaa muujinaysa dadaalka ay ugu jiraan nabad-raadinta, iyadoo ururku u arkay diinta Islaamka inay tahay xabag isku keeni karta Soomaalida, islamarkaana ay tahay aalad dagaal lagaga fogaado.[54] Dhinaca kale, *Majmaca Culimada* waxa ay qeyb lixaad leh ka qaateen nabadeynta beelaha qaar horaantii 1990-aadkii. Nabad-raadinta urur diimeedyada waxay sidoo kale la kulantay caqabado, marka loo eego loollanka u dhexeeya ururrada oo ka baxsan keliya khilaafaadka aragti ahaaneed. Waagii hore, dadaallada nabad-raadintu waxay u muuqdeen inay waxtar badan lahaayeen marka hoggaamiyeyaasha diintu ay sameeyaan ballanqaadyo guud oo ah inay dhinacyada wadahadlaan, ama marka diiradda la saarayo wada-xaajood heer deegaan ah, oo u dhexeeya kooxaha u janjeera aragtida kooxeed ee urur diimeedka ku lugta leh wada-xaajoodka.

Saameyn intee le'eg ayay ku yeesheen siyaasadda Soomaaliya, siyaasiyiintuse sidee ayay u arkaan? Waxa ay u muuqata in urur diimeedyadu ay horey saameyn ugu lahaayeen magacaabista siyaasiyiinta iyo shaqaalaha rayidka, gaar ahaan marka uu jiro madaxweyne talada haya oo ururku xiriir shakhsi ama mid shabakad la leh. Waxaa intaa dheer, geeddi-socodkii Carta marka la eego, waxaad mooddaa in *al-Islaax* ay si toos ah u saameysay sharciga. Guud ahaan, diinta ayaa muhiim u ah siyaasiyiinta Soomaalida marka loo eego in ay yihiin – ama ugu yaraan u muuqdaan inay yihiin – Muslimiin ku dhaqma diinta. Marka la eego xasilloonida ururrada diinta ee lagu sheegay warbixintan, waxay u badan tahay inay mustaqbalka dhow sii ahaan doonaan ururro muhiim u ah siyaasadda Soomaaliya.

54. Safi Mahsin, 'The attitude and reaction of the Islamic groups to US/UN intervention in Somalia 1991—1995', in *Africa in the Post-Cold War Era*, ed. Omar Ahmed Saeed, Khartoum: International University of Africa, 2006, 105.

# 6. GUNAANAD IYO TALOOYIN TIXGELIN MUDAN

Urur-diimeedyo – iyo madaxda lala xiriiriyo – waxay muddo dheer saameyn weyn ku lahaayeen, qeybna ka ahaayeen siyaasadda Soomaaliya. Sikastaba ha ahaatee, waxaa inta badan loo arkayay – gaar ahaan dowladda Soomaaliya, saaxiibadeeda caalamka iyo bulshada rayidka ku tiirsan deeq bixiyeyaasha – qeyb gaar ah oo ka duwan. Taasi waxay abuurtay kala fogaansho aan sax ahayn oo u dhexeysa dowladda iyo urur diimeedyada, waxayna taasi keentay in dowladda ay ku guul-darreysatay inay ka faa'iideysato saameynta xooggan ee wanaagsan oo ay ururrada diimeed inta badan ku leeyihiin dowladnimada Soomaaliya.

Dhab ahaan, kooxaha diintu waa kuwo firfircoon, oo inta badan u shaqeeya sidii shabakad dabacsan, waxayna u muuqdeen kooxo cadaadis saara dowladda iyo sidoo kale qeyb muhiim ah oo kaalimo kala duwan ciyaarta. Dhinaca siyaasadda, urur diimeedyada waxa ay caan ku ahaayeen isku-daygooda (badanaa guuleysta) ay ku saameeyaan maamullada talada haya, waxa ay sidoo kale door muhiim ah ka ahaayeen abuurista xisbiyo siyaasadeed oo cusub. Waxay saameyn dadban ku leeyihiin bulshada iyagoo wacdiya, sidoo kalena isticmaala marino kale oo ay dadka kula hadlaan, kuwaasoo aad waxtar ugu leh in la gaaro guud ahaan shacabka Soomaaliyeed. Inkastoo ay inta badan door wanaagsan ka ciyaareen dhexdhexaadinta dhaqdhaqaaqyada siyaasadeed ee Soomaaliya – iyagoo taageeray shirarka nabadeed iyo dadaallada dib-u-heshiisiinta maxalliga ah – waxay sidoo kale ku hawlan yihiin howlo ka baxsan saaxadda siyaasadda, oo ay ku jiraan bixinta adeegyada muhiimka ah iyo dadaallada gargaarka bini'aadamnimo.

Tan iyo burburkii dowladdii dhexe sanadkii 1991, kooxaha diineed waxay muujiyeen awood jiritaan oo cajiib ah marka la barbar dhigo jilayaasha kale ee sida degdega ah isu beddela. Inkastoo ay xilliyada qaar isticmaaleen jilayaasha kale ee siyaasadda, haddana ficilladooda guud ahaan waxa dhiirigeliya caqiidadooda diineed, halkii ay dhiirrigelin lahayd dano gaar ah. Tani, sikastaba ha ahaatee, kama hor istaageyso in ururrada diinta ay la falgalaan ama, mararka qaar, isku milmaan shabakadaha qabiilka iyo ganacsiga.

Marka la eego waayo-aragnimadaas baaxadda leh, culumada diinta waxay u badan tahay inay noqon karaan kuwo waxtar u leh koox kasta ama shaqsi kasta oo doonaya inuu ka shaqeeyo arrimo siyaasadeed ama bulsho ee Soomaaliya maanta. Intaa waxaa dheer, ururrada diinta ayaa kaalin mug leh ka ciyaari doona hannaanka dimuqraadiyeynta ee dalka iyo qaabeynta ballaaran ee dejinta siyaasadeed ee dalka sanadaha soo socda. Inkastoo qaar kamid ah fikradaha laga yaabo in loo arko inay kasoo horjeedaan xeerarka dimuqraadiga ah, sida sinnaanta jinsiga, qaar badan oo kamid ah ururrada diinta ayaa muujiyay heer dabacsanaan iyo waaqici ah ee qaabeynta ajendayaashooda.

### Talooyin tixgelin mudan

Marka la eego arrimaha aan kor kusoo xusnay, wada shaqeyn dhow oo dhex marta Dowladda Federaalka Soomaaliya (oo ay ku jiraan saaxiibadeeda caalamka iyo bulshada rayidka Soomaaliya) iyo ururrada diinta ee dalka waxay noqon kartaa horumar wanaagsan

oo dowladda ka caawin doona inay kor u qaaddo kalsoonida lagu qabo arrimaha qaarkood, oo ay kamid yihiin dib-u-heshiisiinta, waxbarashada madaniga, ilaalinta bulshada, gargaarka bini'aadamnimada iyo amniga. Si taasi u hirgasho, dowladda iyo saaxiibadeeda caalamka iyo kuwa gudaha waa in ay la yeeshaan ururrada diinta wada-hadal joogto ah oo wax dhisaya. Si tan loo siiyo fursadda ugu wanaagsan, dhowr waxyaalood waa in la tixgeliyaa.

**La shaqeynta kooxaha diintu waa in ay noqotaa mid dhab ah oo ku saleysan sinnaanta ka dhexeysa jilayaasha kala duwan.** Wada-hadallada u dhexeeya dowladda iyo ururrada diintu waa in la qaabeeyaa, loona habeeyaa, hab abuuraya fursad ay kooxaha diintu saameyn togan ugu yeelan karaan shaqada dowladda ee mustaqbalka. Dowladdu waa in ay si siman ula dhaqantaa ururrada diinta oo aan loo arkin in ay koox gaar ah u xaglinayso. Xiriirka rasmi ah waa inuu sidoo kale tixgeliyaa tartanka ka dhexeeya kooxaha diimeed ee kala duwan iyo ajendayaashooda kala duwan, iyadoo laga taxadarayo in lasii xumeeyo wax kasta oo iskasoo horjeeda oo dhexdooda ah.**Marka beesha caalamku ay la falgaleyso ururrada diinta waa in ay ka fogaadaan muraayadaha ay ku eegaan ee uu abuuray barnaamijkii La Dagaalanka Argagixisada**. Hababka labaatankii sano ee lasoo dhaafay la isticmaalayay waxa ay si aad ah u dhaawacday habka ay dalalka caalamka ula falgaleen kooxaha diinta ee Soomaaliya. Ka sokow faham la'aanta aasaasiga ah ee ururrada diinta ee Soomaaliya intooda badan, habka ma uusan ka caawinin dalalka caalamka inay ku guuleystaan gaaritaanka ajendahooda (oo inta badan amniga diiradda saarayay) ee dalka. Si loo saxo khaladaadkaas, dalalka caalamka waa in ay aqoonsadaan doorka wax-ku-oolka ah oo ay ururrada diinta ka ciyaareen, welina ay ka ciyaarayaan dhammaan qeybaha bulshada Soomaaliyeed. Tani waxay u sahlaysa ururrada diinta inay ku shaqeeyaan si daaf-furan, waxayna u sahlaysaa inay si wanaagsan uga qeyb qaataan howlaha danta labada dhinac ah – oo ay ku jirto ka hortagga xagjirnimada diimeed iyo la dagaalanka xaaladaha bini'aadamnimo.

**Urur diimeedyadu waa saamiley muhiimka ah ee Ururada Bulshada Rayidka ee Soomaaliya waana in loo aqoonsadaa sidaas**. Ururrada diinta waa qeyb muhiim ah oo kamid ah bulshada rayidka ah ee Soomaaliyeed, laakiin tani waxa lagusii wanaajin karaa isku dayo firfircoon. Ururrada diintu waxay khibrad dheer u leeyihiin bulshada Soomaaliyeed waxayna sidaas ku kasbadeen kalsooni weyn. Waxay sidoo kale ka shaqeeyaan arrimo kala duwan oo khuseeya bulshada rayidka ee Soomaaliya. Ururrada Bulshada Rayidka waa inay ka faa'iidaystaan xiriirka adag ee ururrada diimeed ay la leeyihiin deegaannada iyagoo abuuri kara iskaashi badan oo looga faa'ideysan karo xirfadda iyo sifooyinka gaarka ah ee xubin kasta oo katirsan bulshada rayidka.

**Cilmibaaris dheeraad ah ayaa loo baahan yahay oo lagu sameeyo doorka ururrada diinta ee Soomaaliya.** Hay'adaha cilmibaarista Soomaaliya, xarumaha fikirka iyo jaamacadaha waa in ay sameeyaan cilmibaaris dheeraad ah si aan si fiican ugu fahanno doorka ururrada diintu ay ku leeyihiin bulshada iyo siyaasadda dalka. Cilmibaaristu waxay ka caawin kartaa jileyaasha kala duwan inay helaan habab si wax-ku-ool ah loola macaamilo ururrada diimeed iyo in la tixgeliyo in hababkii hore ay ku guuldareysteen inay fahmaan, ama la iska indhatiray.

# TIXRAAC

Abdullahi, Abdurahman. *Al Islax Movement in Somalia*. Mogadishu: Hiraan, 2008.

—. *The Islamic Movement in Somalia: A Study of the Islah Movement, 1950—2000*. London: Adonis & Abbey publishers, 2016.

Adam, Hussein Mohammed. 'Islam and Politics in Somalia'. *Journal of Islamic Studies* 6/2 (1995): 189—221.

Associated Press. 'Militants join Somali government'. 16 March 2010. Accessed 16 March 2021. (http://archive.boston.com/news/world/africa/articles/2010/03/16/militants_join_somali_government/)

BBC News. 'Coronavirus: Fighting al-Shabab propaganda in Somalia'. 2 April 2020. Accessed 17 March 2021. (www.bbc.com/news/world-africa-52103799)

Bradbury, Mark and Sally Healy. 'Whose peace is it anyway? Connecting Somali and international peacemaking'. *Accord, an international review of peace initiatives* 21 (2010).

Bruzzi, Silvia. *Islam and Gender in Colonial North-East Africa*. Leiden: Brill, 2018.

Coulson, Noel James. *A History of Islamic Law*. Edinburgh: Edinburgh University Press: 1964.

Fox, Jonathan. *An Introduction to Religion and Politics: Theory and Practice*. London: Routledge, 2018.

Gaas, Mohamed Hussein. 'Primordialism vs. instrumentalism in Somali society: is an alternative needed?' *Journal of Contemporary African Studies* 36/4 (2018): 464—483.

Hansen, Stig Jarle. 'Civil War economies, the hunt for profit and the incentives for peace'. AE Working paper 1, 2007.

— and Atle Mesøy. 'The Muslim Brotherhood in the wider horn of Africa'. NIBR Report, 2009.

—, Atle Mesøy and Tuncay Karadas. *The Borders of Islam*. London: Hurst, 2009.

—, Mohamed Gaas and Ida Bary. 'The Muslim Brotherhood in the Arab Winter'. Harvard Kennedy School of Governance discussion paper, September 2017.

Heritage Institute. 'Response to Monitoring Group Allegations'. July 2013. Accessed 1 March 2021. (https://www.heritageinstitute.org/response-to-monitoring-group/)

International Crisis Group. 'Somalia's Islamists'. *Africa Report* 100 (2006).

Kapteijns, Lidwien. 'Gender Relations and the Transformation of the Northern Somali'. *The International Journal of African Historical Studies* 28/2 (1995): 241—259.

Kepel, Gilles. *Muslim Extremism in Egypt: The Prophet and the Pharaoh*. Berkeley: University of California Press, 2003.

Le Sage, Andre. 'Prospects for Al Itihad & Islamist Radicalism in Somalia'. *Review of African Political Economy* 28/89 (2001): 472—477.

—. 'Somalia and the War on Terrorism: Political Islamic Movements & US Counter-Terrorism Efforts'. PhD thesis, Jesus College, Cambridge University, 2004.

—. 'Stateless Justice in Somalia: Formal and Informal Rule of Law Initiatives'. Center for Human Dialogue Report, 2005.

Mahsin, Safi. 'The attitude and reaction of the Islamic groups to US/UN intervention in Somalia 1991—1995'. In *Africa in the Post-Cold War Era*, edited by Omar Ahmed Saeed. Khartoum: International University of Africa, 2006.

Marchal, Roland and Zakaria M. Sheikh. 'Somalia's Salafists'. *Islamic Africa* 6/1—2 (2015): 135—163.

Martin, Bradford G. *Muslim Brotherhoods in Nineteenth-Century Africa*. Cambridge: Cambridge University Press, 2003.

Melchert, Christopher. *Ahmad Ibn Hanbal*. London: Bloomsbury, 2006.

Muhammad, Siddiq Osman Noor. *Ghawth al A'zam Muhyiddin Shaykh 'Abdul Qadir Jilani, Rady Allahu Anhu*. Toronto: Iqra Publications, undated.

Mukhtar, Mohamed Haji. 'Arabic Sources on Somalia'. *History in Africa* 14 (1987): 141—172.

Olad, Mohamed. 'Somali Clerics Warn Women Against Playing Basketball'. VOA, 22 December 22 2016. Accessed 20 March 2021. (www.voanews.com/africa/somali-clerics-warn-women-against-playing-basketball)

Tadesse, Medhane. *Al-Ittihad Political Islam and Black Economy in Somalia: Religion, Money, Clan and the Struggle for Supremacy Over Somalia*. Addis Ababa: Meag printing enterprise, 2002.

United Nations Food and Agricultural Organization (FAO). 'Customary norms, religious beliefs and social practices that influence gender-differentiated land rights'. UN Gender and Land Rights Database (GLRD), 2010. Accessed 11 January 2021. (www.fao.org/gender-landrights-database/country-profiles/countries-list/customary-law/en/?country_iso3=SOM)

United Nations Monitoring Group on Somalia and Eritrea. 'Report of the Monitoring Group on Somalia and Eritrea pursuant to Security Council resolution 1907 (2009)'. S/2010/91, 2010.

—. 'Report of the Monitoring Group on Somalia and Eritrea pursuant to Security Council resolution 2182 (2014)'. S/2015/81, 2015.

de Waal, Alex. 'Somalia synthesis paper'. London School of Economics and Political Science, 2017.

Wagemakers, Joas. 'The Enduring Legacy of the Second Saudi State: Quietist and Radical Wahhabi Contestations of Al-Walāʾ Wa-l-Barāʾ'. *International Journal of Middle East Studies* 44/1 (2012): 93—110.

Webersik, Christian, Stig Jarle Hansen and Adam Egal. 'Somalia: A Political Economy Analysis'. Report commissioned by the Norwegian Ministry of Foreign Affairs, 2018.

Zollner, Barbara. *The Muslim Brotherhood: Hasan al-Hudaybi and Ideology*. London and New York: Routledge, 2009.

# DOORKA URURRADA DIINTA EE SIYAASADDA SOOMAALIYA

## DHAQDHAQAAQYADA MUHIIMKA AH IYO FURSADAHA KA-QEYBGALK

Ururrada diinta ayaa door muhiim ah ku leh siyaasadda Soomaaliya. Tan iyo burburkii qarankii Soomaaliya 1991-kii, waxay sidoo kale muujiyeen adkeysi xooggan iyadoo jilayaal badan oo oo kale ay soo ifbaxeen si degdeg ahna saaxadda uga baxeen. Tani waxay ka dhigtay hay'ado muhiim u ah bulshada Soomaaliyeed. Iyadoo ay taasi jirto, haddana doorka ururrada diinta ee Soomaaliya ayaa inta badan si liidata loo fahmaa. Doorka ururrada diinta ee siyaasadda Soomaaliya – oo ah warbixin cusub oo ay wada qoreen Machadka Rift Valley iyo Somali Public Agenda – waxaa lagu falanqeeyay ururrada kala duwan ee diinta ee saameynta ku leh siyaasadda Soomaaliya iyo guud ahaan mowqifkooda iyo doorka ay ku leeyihiin bulshada Soomaaliyeed. Waxay warbixinta soo bandhigeysaa aragtiyo cusub oo ku saabsan sida dowladda Soomaaliya ay ula falgeli karto kooxaha diinta, waxayna soo jeedinaysaa talooyin ku saabsan sida jilayaasha dibadda ay uga fogaan karaan aragtiyada taban oo ku saabsan ururrada diinta kuwaasoo inta badan saameyn togan ku leh guud ahaan qeybaha kala duwan ee siyaasadda, dhaqaalaha iyo nolosha bulshada Soomaalida.

Rift Valley Institute
MAKING LOCAL KNOWLEDGE WORK

Somali Public Agenda